WAAXDA WAXBARASHADA EE GOBALKA KANSAS
XAQUUQDA WAALIDKA EE KU AADAN WAXBARASHADA GAARKA AH
(Nidaamka Ilaalooyinka)

Labadiinaba adiga iyo dugsiga waxaad wadaagtaan waxbarashada cunugaaga. Haddii midkiin adiga ama dugsiga uu walaac ah ka haysto waxbarashada cunugaaga, adiga iyo macalinka cunugaaga waa inaad si furun oga wada hadashaan. Haddii aadan ku qancin wada hadalkaas, waa inaad la xariirto agaasimaha waxbarashada gaarka ah ee dugsiga degmadaada. Waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad qayb wayn ka qaadato waxbarashada cunugaaga.

Waaliddiinta carruurta kuwaa soo, ama noqon kara, gaar ah, waxaad leedahay xuquuqo gaar ah ama ilaalin qaabsocod sida hoos timaada sharciyada federaalka iyo midka gobolka. Xaquuqahaas waxaa lagu qoray *Ogeysiiska Tallaabooyinka Badqabka.* Liiskaan aad ka helayso xaquuqahaaga waxaa qasab ah in lagugu siiyo luuqadaada hooyo ama habka kale oo aad ku fahmi karto. Haddii aad jeclaan lahayd inaad hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xaquuqahaas, fadlan la xariir maamulaha dugsiga cunugaaga, maareeyaha dugsiga, agaasimaha waxbarashada gaarka ah, ama Kansas State Department of Education (Waaxda Waxbarashada Gobalka Kansas) (KSDE), oo xaruuntoodu tahay 900 SW Jackson St. Suite 620, Topeka, KS 66612; ama wac taleefoonkaan (800) 203-9462. Koobiyada xaquuqahaas oo ku qoran luuqadaha Braille, audiotape, iyo kuwo kale waxaa laga heli karaa dugsigaaga haddii laga codsado. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan xaquuqdaada, waxaad codsan kartaa koobiga Hagaha Waxbarashada Gaarka ah ee soo diyaariyaan *Families Together, Inc*.: Wichita 1-888-815-6364 ama (316) 945-7747 Khadka/Wicitaanka ee loogu talagalay dadka dhagaha la' ama culus; Garden City 1-888-820-6364 ama (620) 276-6364 Khadka/Wicitaanka ee loogu talagalay dadka dhagaha la' ama culus; Topeka 1-800-264-6343 ama (785) 233-4777; Magaalada Kansas 1-877-499-5369 ama (913) 287-1970 ama Kansas State Department of Education (Waaxda Waxbarashada Gaarka ah ee Gobalka Kansas) (800) 203-9462. Waxaa intaas siidheer, Buug gacmeedka ay ku qoraan yihiin Kansas Special Education Process Handbook (Nidaamka Waxbarashada Gaarka ah ee Kansas) waxaa laga helayaa Webseetka Kansas State Department of Education (Waaxda Waxbarashada ee Gobalka Kansas) oo ah www.ksde.org.

Ogeysiiska Nidaamka Ilaalooyinka

Waxaa dib u eegis lagu sameeyay Agoosto 2010

Shaqsiyaadka Naafada ah ee qaybta ka ah Disabilities Education Improvement Act (Sharciga Hormarinta Naafada) (IDEIA), sharciga federaalka ee loogu talagalay waxbarashada ardayda naafada ah, waxa uu dugsiga ka doonayaa inay ku siiyaan, waalidiinta ubadka naafada ah, ogeysiis ay kujirto sharaxaad buuxda oo ku saabsan habkia badqabka ee laga heli karo IDEA iyo Xeerarka Waaxda Waxbarashada Mareykanka. Koobiga ogeysiiskaan waxaa qasab ah in lagu siiyo kaliya hal mar inta lagu jiro sanad dugsiyeedka, illaa mooyee in koobigaas qasab yahay in lagu siiyo: (1) marka la eego gudbintii hore ama qiimeynta codsigaaga; (2) helida cabashadaadii ugu horeysay ee Gobolka ee hoos timaad 34 CFR §§300.151 illaa 300.153 iyo helitaanka cabashadaada nidaamka dhowrista xaquuqda marka loo eego §300.507 sannad dugsiyeedka; (3) marka go'aan lagu gaaro in talaabo edbin ah oo ka dhan ah cunugaaga la qaado taas oo ka dhigan badelka meelaynta ayadoo lagu saleenaayo §300.536; iyo (4) marka aad codsatid. [34 CFR §300.504(a)]

Nidaamkan ogeyiiska ee ilaalooyinka waxaa qasab ah inay kujiraan sharaxaad buuxda oo ku saabsan nidaamka ilaalooyinka ee la heli karo ayadoo la adeegsanaayo §300.148 (meelaynta midaysan ee ilmaha dhigta dugsiga gaarka loo leeyahay oo ku baxa kharashka dawlada), §§300.151 ilaa 300.153 (Nidaamka cabashada ee gobolka), §300.300 (oggolaanshaha waalidka), §§300.502 iyo 300.503 (IEE iyo ogeysiis hore oo qoraal ah), §§300.505 illaa 300.518 (nidaamka ilaalooyinka kale, tusaale ahaan, dhexdhexaadinta, cabashooyinka nidaamka dacwada, nidaamka xallinta, iyo dhageysiga habka cadaalad

ah), §§300.530 ilaa 300.536 (ilaalooyinka nidaamka Qaybta E ee Qeybta B ee xeerarka la xiriira ficillada edbinta), iyo §§300.610 ilaa 300.625 (qarsoodiga qodobbada macluumaadka ee Qaybta F).

Ogeysiiska Shuruudaha Uu Soosaaray Gobolka Loogama baahna Qeybta B ee IDEA ama Xeerarkeeda Fulinta

Iyadoo la raacayo qawaaniinta federaalka, ee 34 C.F.R. 300.199 (a) (2), tani waa ogeysiis qoran oo ku saabsan shuruudaha dheeraadka ah ee lagu soo rogay gobolka, ee aan u baahnayn Qaybta B ee IDEA ama qawaaniinta fulinta. Shuruudaha Gobolka waxaa lagu gartaa astaanta (*) waxayna yeelan doonaan tixraacyada xeerarka iyo shuruucda Kansas, sida uu tilmaamay K.S.A ama K.A.R.

Jadwalka Mawduucyada

Macluumaadka Guud……1
*Xaruumaha Isbarbardhiga ee da'da ku habboon ... 1
*Qiimeynta Nidaamyada ... 1
*Warbixinta Qiimeynta ... 1
Ogeysiiska Hore ee Qoran ... 1
Luuqada Asalka ah ... 2
Iimaylka Elaktarooniga ah ... 2
*Qaybta aan Kamidka ahayn ... 2
*Adeegyada Badelka iyo Yoolalka Ka danbeeya dugsiga sare ... 2
Oggolaanshaha Waalidka - Qeexida ... 3
Oggolaanshaha Waalidka ... 3
*Oggolaanshaha waalidka ee isbadelka agabka ee adeegyada ama isbadelka la taaban karo ee meelaynta ... 5
*Kala noqoshada Oggolaansha ee ku aadan Adeegyada Gaar ah ... 5
Qiimeynta Madaxa banaan ee Waxbarashada ... 5

Ilaalinta Macluumaadka ... 7
Qeexitaanada ... 7
Aqoonsiga Shaqsiyaadka ... 7
Ogeysiiska Loo diro Waalidka ... 7
Helitaanka Xaquuqaha ... 7
Helitaanka Diiwaanada ... 8
Diiwaanada wixii Kabadan Hal Cunug ... 8
Noocyada Macluumaadka iyo Liiska Goobaha ... 8
Kharashaadka ... 8
Codsiga Waalidka ee ku saabsan Wax ka Badelida Diiwaanada ... 8
Fursada Dhageysiga Dacwada ... 9
Nidaamyada Dhageysiga Dacwada ... 9
Natiijada Dhageysiga Dacwada ... 9
Oggolaanshaha Soo bandhigida Macluumaadka Aqoonsiga Shaqsiyaadka ... 9
Ilaalinta ... 9
Burburinta Macluumaadka ... 10

Nimaamyada Cabashada Gobalka ... 11
Farqiga u dhaxeeya Nidaamyada Dhageysiga Dacwadaha ee Jira ama kan Cabashooyinka Gobalka ... 11
Qaadashada Nidaamyada Cabashada Gobalka ... 11
Nidaamyada Ugu yar ee Cabashada Gobalka ... 11
Soo gudbinta Cabashada Gobalka ... 12

Nidaamyada Cabashada ayadoo la adeegsanaayo Sharciga Jira 14
Soo gudbinta Cabashada sharciga 14
Cabashada Sharciga ee Jira 14
Qaab Foomamka 15
Dhexdhexaad 16
Nidaamka Dib u xalinta 17

Dhageysiga Cabashada Ayadoo laraacaayo Sharciga Jira 19
Nidaamka Dhageysiga Sharciga ee Eex la'aanta ah 19
Xaquuqada Dhageysiga Dacwada 19
Go'aanada Dhageysiga Dacwada 20

Racfaanada 22
Gabagabada Go'aanka; Racfaanka; Dib u eegista Daacada Ku salaysan 22
Jadwalka iyo waqtiga ku habboon ee Dib u eegista Dhageysiga Dacwada 22
Falcelinta Bulshada, oo ay kujiraan Waqtiga Lasoo Gudbinaayo Dacwada Falalkaas 23
Meelaynta Ilmaha ayadoo ay socoto Dacwada Sharciga Lana sugaayo Dhageysiga Dacwada 24
Kharashaadka Qareenka 24

Nidaamyada Tarbiyeenta Ilmaha qaba Naafonimada 26
Shaqsiyaadka Muumulaha Dugsigaa 26
Badelka Meelaynta sababo laxariira in looga saaray arimo laxariira akhlaaqda 28
Go'aanta Goobta 28
Racfaanka 28
Racfaanada Inta lagu Gudo jiro Meelaynta 29
Ilaalinta Ilmaha aan wali u qalmin Waxbarashada Gaarka ah iyo Adeegyada Quseeya 29
U gudbinta iyo Dhaqangelinta Ficilka Sharciga iyo Maamulka Garsoorka 30

Shuruuda Meeleynta Guud ee Waalidka Caruurta dhigta Dugsiyada Gaarka Loo Leeyahay laguna saleeyo Kharashaadka Dawlada 31
Shuruudaha Federaalka ee Caruurta sida Bilaashka ah u dhigta Dugsiyada Gaarka loo leeyahay 31
*Shuruudaha Gobalka ee Caruurta sida Bilaashka ah u dhigta Dugsiyada Gaarka loo leeyahay 31
Marka ay tahay in lasameeyo Waxbarashada Bilaashka ah ee Dadwaynaha (FAPE) 31

MACLUUMAADKA GUUD

*XARUUMAHA ISBARBARDHIGA EE DA'DA KU HABBOON

K.A.R. 91-40-52(d)

Dhammaan xaruumaha loogu talagalay caruurta aan caadiga ahayn waa inay la siman yihiin kuwa caruurta caadiga ah. Sidoo kale,dhamaan xaruumahaa caruurta aan caadiga ahayn waa in lagu saleeyaa da'da iyo bay'ada goobta sidoo kale bay'o kasta waa in lagu saleeyaa waxbarashada barnaamijka.

*QIIMEYNTA NIDAAMYADA

K.A.R. 91-40-7(c)

Guddiga waxa ay cunuga dhigta dugsiga dadwaynaha u diri karaan in lagu sameeyo qiimeyn haddii mid kamid ah shuruudahaan soosocda laga soobaxo:

1. Haddii shaqaalaha dugsiga ay hayaan dukumeentiyo ku saleysan xog muujinaysa wax ka qabashada waxbarashada guud iyo istiraatiijiyaddu aysan ku filnayn in wax looga qabto meelaha laga welwelsan yahay cunuga;
2. Haddii shaqaalaha dugsiga ay hayaan dukumiintiyo ku saleysan xog muujinaysa kahor inta aan lasoo gudbin ama qayb kamid ah gudbinta, in dhamaan shuruudaan soosocda laga soobaxay: (a) In cunuga lasiiyay waxbarasho ku habboon oo joogto ah ayna wax barayaan shaqaale uqalma; (b) in guulaha tacliimeed ee cunuga ay ahaaayeen kuwo si isdaba joog ah loogu qiimeeyo waqti go'an oo ka turjumaaya qiimeynta rasmiga ah ee horumarka ardayga inta lagu jiro waxbarashadiisa; (c) in natiijooyinka qiimaynta lasiiyay waalidka cunuga ama waalidiinta; (d) in natiijooyinka qiimayntu ay muujinayso in qiimayntu tahay mid habboon ama
3. Waalidka ilmaha ay codsadaan, ayna soo gudbiyaan oggolaansho qoran, oo ku salaysan qiimeynta ilmaha, iyo in guddigu ay isku raaaceen in qiimeynta ilmaha tahay mid ku habboon.:

*QIIMEYNTA WARBIXINTA

K.A.R. 91-40-10(a)

Qiimeynta qoran waxaa la iska rabaa kadib marka la dhamaystiro qiimeyn kasta ama qiimeynadii hore, ayadoo loo eegeyn qaybaha laga reebay ee aan loo oggolayn

OGEYSIISKA HORE EE QORAN

34 CFR §300.503

Ogeysiis

Dugsigaaga degmada waxaa qasab ah inay ku siiso ogeysiis qoran (ay kusiiso macluumaad qoraal ah oo qoran), waana inay kugu siiyaan waqtiga ugu macquulsan kahor inta:

1. Uusan badelin ama soo gudbin aqoonsiga, qiimeynta, ama meelaynta waxbarshada ilmahaaga, ama aysan ka qorin waxbarasho ku habboon ilmahaaga oo bilaash ah (FAPE); **ama**
2. Uusan diidin ama soo gudbin aqoonsiga, qiimeynta, ama meelaynta waxbarshada cunugaaga, ama aysan ka qorin waxbarasho ku habboon cunugaaga oo bilaash ah (FAPE).

Waxyaabaha uu Ka kooban yahay ogeysiiska

Ogeysiiska qoran waa inuu:

1. Lahadaa ficil qeexaya soojeedinta dugsiga degmadaada ama mid diidaaya;
2. Sharaxaa sababta dugsiga degmadaadu u soo jeedinayso ama u diidayso inay qaado tallaabo;
3. Sharaxaa qiimeynta, dib u eegista, diiwaano kasta, ama warbixin degmo dugsiyeedka loo adeegsaday go'aaminta soo jeedinta ama diidmada tallaabada;

4. Oo ay kujiraan bayaanka aad heshay ee ku saabsan nidaamka ilaalooyinka shuruudaha sida uu qabo Qaybta B ee IDEA;
5. Kuu sheegi sida aad u heli kartid qeexitaanka nidaamka ilaalooyinka haddii tallaabada ay degmadu soo jeedinayso ama diidayso in aysan ahayn gudbinta biloowga ah ee qiimaynta;
6. Oo ay kujiraan waxyaabaha aad la xariiri karto si lagaaga caawiyo fahanka sidaad u fahmi lahayd Qeybta B ee IDEA;
7. Qeex dookhyo kale oo cunugaaga ku saabsan Kooxda tixgelinaysa barnaamijka waxbarashada gaarka ah (IEP), sababta dookhydaas loo diiday; **iyo**
8. Qeexaayo sababaha kale ee keenay in dugsiga degmadaada uu soo jeediyo ama diidaado arintaas.

Ogeysiiska Kuqoran Luuqad La Fahmi karo

Ogeysiiska waa inuu:

1. Ku qoran luuqad ay fahmi karan dadwaynaha; **iyo**
2. Laguugu siiyay luuqadaada hooyo ah ama qaabka kale oo aad fahmi karto, illaa aysan suurtagal ahayn mooyee.

Haddii luuqadaada hooyo ama hab kale oo isgaarsiin aad fahmi karto aan lagu qorin, dugsiga degmadaada waxaa qasab ah inaad hubiso:

1. In ogeysiiska laguugu turjumay maqal ahaan ama qaab kale ayadoo la adeegsanaayo luuqadaada hooyo ama hab kale oo isgaarsiin aad fahmi karto;
2. Waa inaad fahantaa waxa uu ka kooban yahay ogeysiiska; **iyo**
3. Waxaa jira caddayn qoran oo ah in shuruudaha ku jira sadarada 1 iyo 2 ayaa la buuxiyey.

LUUQADA HOOYO

34 CFR §300.29

Luuqada Hooyo, marka uu isticmaalo shaqsi aqoon xaddidan u leh Ingiriisiga, waxaa loola jeedaa waxyaabaha soosocda:

1. Luuqadda sida caadiga ah uu adeegsado qofkaas, ama, loo aadeegsado kiiska cunuga, luuqada sida caadiga ah ay adeegsadaan waalidiinta cunuga;
2. Dhamaan xariirka toos ah ee ilmaha (oo ay kujiraan qiimeynta ilmaha), luuqada caadiyan cunuga ku isticmaalo guriga ama meesha uu waxkubarto.

Qofka indhoolaha ama dhagoolka ah, ama qofka aan qori karin luuqad, ama nooc luuqada uu isticmaalo caadiyaan (sida luuqada dhagoolyaasha, Braille, ama hadalka afka).

IIMAYLKA ELAKTAROONIGA AH

34 CFR §300.505

Haddii degmadaadu ay siiso waalidiinta ikhtiyaarka ah inay dukumiintiga ku helaan iimayl ahaan, waxaad dooran kartaa inaad ku hesho waxyaabaha soo socda iimayl:

1. Ogeysiiska Hore ee Qoran;
2. Nidaamka ogeysiiska ilaalooyinka; **iyo**
3. Ogeysiisyada la xiriira cabashada nidaamka jira

*QAYBAHA AAN KAMIDKA AHAYN

K.S.A. 72-962(g)

Qaybaha laga reebay ee lagu soo daray Kansas special education laws and regulations (shuruucda I iyo qawaaninta waxbarashada gaarka ah ee Kansas) ku dar qaybta "hibada" ee carruurta kujira da'da dugsiga. .

*ADEEGYADA BADELKA IYO YOOLALKA KA DANBEEYA DUGSIGA SARE

K.S.A. 72-987(c)(8) iyo K.A.R. 91-40-1(uuu)

Laga bilaabo da'da 14 oo loo cusbooneysiyo sanadle, cunuga kujira IEP ee naafada ah waxaa qasab ah in lagu daro: (a) qiimeyn lagu saleenaayo yoolalka waxbarashada kadib dugsiga sare oo qiimo leh sida tababarkaa, waxbarashada, shaqada iyo xirfadaha ku habboon ee madaxa banaan; iyo (b) adeegyada kala guurka, oo ay kujiraan barashada maadooyinka ku habboon, ee ka caawinaaya ilmaha inuu gaaro yoolalkiisa waxbarashada dugsiga sare kadib.

OGGOLAANSHAHA WAALIDKA - QEEXIDA

34 CFR §300.9

Oggolaansho

Oggolaansha micnaheedu waa:

1. Waxaa si buuxda laguugu sheegay macluumaadka ayadoo la isticmaalaayo luuqada hooyo ah ama qaab kale oo aad fahmayso (sida luuqada dhagoolayaasha, Braille, ama hadalka afka) iyo dhamaan macluumaadkaa ku saabsan hawlahaas iyo kuwa aad oggolaansho dhiibayso.
2. Waxaad fahansantahay oo aad ku qanacsan tahay qoraal ahaan ficilkaas, oggolaashaduna waxay uu sharaxayaaaa hawlaha diiwaannada (haddii ay jiraan) ee lasoo bandhigi doono iyo cidda lala wadaagi doonaba; **iyo**
3. Waxaad fahan santahay in oggolaanshuhu ikhtiyaar yahay aadna kanoqon karto oggolaanshahaaga wakhti kasta.

Haddii aad dooneysid inaad ka noqotid (joojiso) oggolaanshahaaga kadib marka cunugaagu bilaabo inuu helo waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xariira, waa inaad sidaas kusoo gudbisaa qoraaal ahaan. Ka noqoshada oggolaanshaaga kuuma saamaxayso inaad (dib oga noqotid) hawl dhacday kadib markaad bixiso oggolaanshahaaga laakiin kahor intaanad laaban. Intaas waxaa sii dheer, dugsiga degmada looma baahna inuu wax ka badelo (baddelo) diiwaannada waxbarashada ee ilmahaaga si looga saaro wixii tixraac ah oo ah in ilmahaagu helay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xariira kadib markaad ka baxdo oggolaanshaha.

OGGOLAANSHAHA WAALIDKA

34 CFR §300.300

Oggolaanshaha qiimeynta hore

Dugsiga degmadaada ma sameyn karo qiimeyn hore oo uu ku ogaaanaayo in cunugaagu u qalmo Qaybta B ee IDEA iyo inuusan u qalmin si uu u helo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada kale ee la xariira ayagoo marka hore kusoo dirin ogeysiiska hore ee oran kuna soo jeedinayaan inay sameeyaan hawshaas dhanka kale helida oggolaanshahaaga waxaa lagu qeexay hoosta ciwaanka ***Ogeysiiska Hore ee Qoran*** iyo ***Oggolaanshaha Waalidka*****.**

Dugsiga degmadaadu waa inuu sameeyaa dadaal macquul ah si loo helo oggolaanshahaaga ogeysiinta qiimaynta hore si loo go'aamiyo bal in cunugaagu yahay naafo iyo in kale.

Oggolaanshahaaga qiimeynta hore micnihiisu ma ahan inaad sidoo kale siisay dugsiga degmada oggolaanshaha ay ku siinayaan cunugaaga waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada kale ee la xariirta.

Dugsiga degmadaadu ma isticmaali karto diidmadaada oggolaanshaha hal adeeg ama nashaadaad la xariira qiimeynta biloowga ah aasaaska loogu diidaayo adiga ama ilmahaaga adeeg kale, faaiido, ama nashaadaad u leh, hadii aan qeybta kale ee B looga baahneyn inay degmadu sidaas sameyso.

Haddii ilmahaaga laga qoray dugsiga dadwaynaha ama aad dooneyso in ilmahaaga laga qoro dugsiga dadwaynaha aadna diiday inaad siiso oggolaanshaha ama aad ku guuldareysato inaad ka jawaabto codsi ah inaad bixiso oggolaanshaha qiimayn biloow ah, dugsiga degmadaadu ayaa sidaas sameyn kara, laakiin looma baahna, inay raadiso qiimeynta biloowga ah ee ilmahaaga ayadoo adeegsanaya dhexdhexaadinta IDEA ama dacwada cadaalada oo sharci ah. , kulanka xalinta, iyo qaab socodka dhageysiga nidaamka xaquuq dhowrista ah. Dugsiga degmadaadu kuma xad gudbi doonto waajibaadka

ka saaran inuu helo, aqoonsado oo ayna qiimeeyaan ku sameeyaan ilmahaaga haddii aysan ku sii wadin qiimaynta ilmahaaga duruufahaas.

Sharciyada gaarka ah ee ku salaysan qofka kujira sharciga Gobalka

Qofka ku hoos jira sharciga Gobalka, sida uu qabo IDEA, waxaa loola jeedaa ilmo, sida uu go'aamiyay Gobolka halka uu ilmuhu ku noolyahay, waa: 1. Korinta ilmaha; 2. Waxaa loo tixgeliyaa qof kub hoos jira sharciga Gobolka iyada oo la raacayo sharciga Gobolka; **ama** 3. In gacanta lagu hayo hay'adda badbaadada carruurta ee dadweynaha. (*Qofka ku hoos jira sharciga Gobalka* kuma jiro ilmaha la korsanaayo ee leh waalid korinaaya oo la kulmaya qeexitaanka waalidka sida ay qabto IDEA.)

Haddii ilmaha ku hoos jira sharciga gobalka uusan la noolayn waalidkiis — dugsiga degmadu uma baahna oggolaanshaha waalidka ee qiimaynta hore si loo go'aamiyo haddii ilmuhu yahay ilmo naafo ah haddii:

1. Ay jiraan dadaallo macquul ah oo sidaas lagu sameenaayo, dugsiga degmadu ma heli karo waalidka cunuga;
2. Waxaa meesha laga saaray xaquuqda waalidinta sida waafaqsan sharciga Gobalka; **ama**
3. Garsooraha waxaa loo xilsaaray xaquuqda go'aamada ka gaarista waxbarashadda qof aan ahayn waalidka dhanka kale shaqsiyaas waxaa la siiyay oggolaansho qiimaynta hore.

Adeegyada Oggolaanshaha Waalidka

Dugsiga degmadaada waxaa qasab ah inuu helo warxinta oggolaanshahaaga kahor inta uusan ilmahaaga ku meelayn waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xariira marka koowaad.

Dugsiga degmadaada waxaa qasab ah inuu sida ugu suurtagalka ah iskugu dayo inuu helo oggolaanshahaaga kahor inta uusan ilmahaaga ku meelayn waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xariira marka koowaad.

Haddii aadan kasoo jawaabin codsiga bixinta oggolaanshaha in cunugaaga lagu meeleeyo waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xariira marka koowaad, ama aad diido inaad bixiso oggolaanshahaas amaba aad gadaal oga noqoto (aad joojiso) oggolaanshahaagii qoraalka ahaaa, dugsiga degmadaada waxaa laga yabaa inuusan isticmaalin nidamaka badqabka (tusaale ahaan, dhexdhexaadka, cabashada Sharci hada, kulanka dib u xalinta. ama dacwada dhagaysiga eex-la'aan ah) si loo helo heshiis ama xukun in waxbarashadda gaarka ah iyo adeegyada la xariira (ay soojeediyaan kooxda IEP da ee ilmahaaga) in la siin karo cunugaaga ayadoo oo aan oggolaansho lagaa helin.

Haddii aad diidid inaad cunugaaga siisid oggolaanshaha meelaynta waxbarashada gaarka ahn iyo adeegyada la xariira marka koowaad, ama aadan kasoo jawaabin codsiga lagaaga codsaday ama aad gadaal ka diiday (jiijisay) oggolaanshahaagii qoraalka ahaa dugsiga degmadu ma siinaayo ilmahaaga waxbarashadda gaarka ah iyo adeegyada la xariira ee ay ku dalbadeen oggolaanshahaaga, degmadaada dugsiga:

1. Waa inuusan ku xadgudbin shuruudaha looga dhigaayo ilmahaaga waxbarashadda guud ee bilaashka ah ee munaasibkana ah (FAPE) inay u heli karto ilmahaaga ku guul darreysiga inuu adeegyaddaas siiyo ilmaha; iyo
2. Waa inuusan u baahnayn in la yeesho barnaamijka waxbarashada shaqsiyadeed (IEP) ama loo soo saaro IEP cunugaaga waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xariira ee oggolaanshahaaga la codsaday.

Haddii aad ka noqotid (joojisid) dhamaan oggolaanshahaaga ku aadan waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xariira qoraal markasta oo ilmahaaga la siiyo sida waxbarashadda gaarka ah iyo adeegyada la xariira, markaas degmadu masii wadi doonto bixinta adeegyadaan, laakiin waa inay ku siisaa Ogaysiiska qoraalka ah, sida lagu sharaxay ciwaanka '***Ogeysiiska Qoraalka Hore***, kahor inta aadan joojin adeegyadaan.

Adeegyada Oggolaanshaha Dib u qiimeynta

Dugsiga degmadaada waxaa qasab ah inuu helo oggolaanshahaaga kahor inta uusan sameyn dib u qiimeynta cunugaaga, ilaa in dugsiga degmadaada ay muujiyaan inay:

1. Sida ugu macquul san iskugu daydo inay hesho oggolaanshahaaga dib u qiimeynta ilmaha; **iyo**
2. Aadan soo gudbin jawaab celin.

Haddii aad diidid oggolaanshaha dib u eegista ilmahaaga, degmada dugsiga waxaa laga yaabaa inay, laakiin looma baahna inay, sameyso dib u qiimeynta ilmahaaga iyadoo la adeegsanaayo dhexdhexaadinta, nidaamka cabashadda, kulanka xalinta, iyo qaab socodka dhageysiga qaab socodka cadaalad ee dhexdhexaadinta ah si ay uga gudubto diidmadaada ee oggolaanshaha dib u qiimeynta ilmahaaga. Sida qiimaynta biloowga ah, degmadaadu kuma xadgudbayso waajibaadkeeda hoos yimaada Qaybta B ee IDEA haddii ay diido inay ku sii waddo qiimeynta qaabkaan.

Diiwaanada macquulka ah ee lagu helaayo oggolaanshaha Waalidka

Dugsigaagu waa inuu joogteeyo dukumiintiyada dadaalada macquulka ah si loo helo oggolaanshahaaga ku salaysan qiimeynta biloowga ah, si loo bixiyo waxbarasho gaar ah iyo adeegyo la xariira markii ugu horreysay, dib u qiimeyn, iyo in loo helo waalidiinta xarumaha Gobolka qiimeynta biloowga ah. Dukumentiyada waa inay kujiraan diiwaanka iskudayada degmada dugsigaa ee aaggaan, sida:

1. Diwaannada faahfaahsan ee wicitaanada dhanka taleefanka ee la diray ama la isku dayay iyo natiijooyinka wicitaanadaas;
2. Nuqulada waraaqada laguu soodiray iyo jawaab kasta oo aad heshay; **iyo**
3. Diiwaanada faahfaahsan ee booqashooyinka lagu tagay gurigaaga ama goobtaada shaqo iyo natiijooyinka kasoo baxay booqashooyinkaas.

Shuruudaha oggolaanshaha kale

Oggolaanshahaaga looma baahna kahor inta degmadaadu:

1. Sameenayso dib u eegista xogta ee ku salaysan qiimeynta ilmaha ama dib u eegista; **ama**
2. In ilmahaaga laga qaado imtixaan ama qiimeyn kale ilaa in la siiyo carruurta oo dhan mooyee, ka hor baaritaankaas ama qiimeyntaas, oggolaanshaha looga baahan yahay waalidiinta dhammaan carruurta.

Haddii aad ilmahaaga ka qortay dugsi si gaar ah loo leeyahay aadna iska bixinayso kharashaadka ama haddii ilmahaaga guriga wax ku barto, aadana bixin oggolaanshaha qiimeynta hore ee ilmaha ama dib u qiimeynta ilmaha, ama aad ku guuldareysato inaad soo gudbiso oggolaanshaha, markaas dugsiga degmada waxa uu isticmaali karaa dib u eegida nidaamka xalinta (tusaale, dhexdhexaadin, cabashada dacwada, kulanka dib u xalinta, ama dhageysiga Sharciga ee Eex la'aanta ah) ee aadna dooneyn in ilmahaaga inuu u qalmo adeega loo siman yahay (adeegyada waaldinimada ee laga helo qaar kamid ah dugsiga gaarka loo leeyahay looguna talagalay naafooyinka).

*OGGOLAANSHAHA WAALIDKA EE BADELKA AGABKA EE LOOGU TALAGALAY ADEEGYADA AMA ISBADELKA LA TAABAN KARO EE MEELEYNTA

K.S.A. 72-988(b)(6), K.S.A. 72-962(aa), K.S.A. 72-962(bb), K.A.R. 91-40-27(a)(3), K.A.R. 91-40-1(mm), iyo 91-40-1(sss)

Dugsiga degmada waxaa qasab inuu helo ogeysiiska qoran ee waalidka kahor inta uusan wax "ka badelin agabka adeegyada" ama "uusan sameyn isbadel muuqda." Isbadelka agabka ee adeegyada waa koror ama hoos u dhac la eg 25 boqolkiiba ama in ka badan oo ah muddada ama inta jeer ee adeega waxbarashada gaarka ah, adeega la xariira ama kaalmada dheeriga ah ama adeega lagu cayimay IEP ee cunuga gaarka ah. Badelka meelaynta muuqata waa dhaqdhaqaaqa aan caadiga ahayn ee cunuga, in ka badan 25 boqolkiiba maalinta dugsiga ee cunuga, laga bilaabo bay'ad xadiidan iyo bay'ad aad u xayiran una gudbo bay'ad xadidaan yar leh.

*KALA NOQOSHADA OGGOLAANSHA EE KU AADAN ADEEGYADA GAAR AH

K.A.R. 91-40-1(l)(3)(C) iyo K.A.R. 91-40-27(k)

Waalidka waxay xaq u leeyihiin inay ka noqdaan oggolaaanshaha adeegyo ama meelayn gaar ah haddii kooxda IEP ay ku caddeeyaan qoraal ahaan in ilmuhu aanu u baahnayn adeegga ama meeleynta kaas oo oggolaanshaha lagala noqonaayo si loo helo waxbarashadda guud ee habboon ee bilaashka ah.

QIIMEYNTA MADAXA BANAAN EE WAXBARASHADA

34 CFR §300.502

Guud ahaan

Sida hoos lagu qeexay, waxaad xaq u leedahay inaad ilmahaaga u hesho qiimeyn waxbarasho oo madax banaan (IEE) haddii aadan ku qanacsanayn qiimeynta ilmahaaga ee ay sameysay degmadu dugsigaaga.

Haddii aad codsatid qiimeynta waxbarasho oo madax banaan. dugisga degmadu waa inuu kusiiyo macluumaad ku saabsan halka aad kaheli karto qiimeynta Madaxa banaan ee Waxbarashada iyo shuruudaha ku saabsan dugsiga degmada ee quseeya qiimeynta waxbarashada madaxa bannaan.

Qeexitaannada

Qiimeynta Madaxa banaan ee Waxbarashada waxaa loola jeedaa waa qiimeyn uu sameeyo baare caalami ah oo aysan shaqaalaysiin dugsiga degmadaada ee masuulka ka ah waxbarashada cunugaaga.

Kharashaadka dawlada waxaa loola jeedaa in degmadu ay bixiso kharashka buuxa ee qiimeynta ama ay hubiso in qiimeynta aan lagugu siin wax kharash ah, iyada oo la raacayo qodobada Qeybta B ee IDEA, taas oo u oggolaaneysa Gobol kasta in uu isticmaalo wax kasta oo ah ilaha taageerada dhaqaalaha Gobol ah, deegaanka, iyo federaali ee laga heli karo Gobolka si ay u buuxiyaan shuruudaha Qeybta B ee Sharciga.

Xaquuqda qiimeynta Kharashaadka Dawlada

Waxaad xaq u leedahay in ilmahaaga laga qaado qiimeyn waxbarasho oo madax banaan ayadoo la adeegsanaayo kharashaadka dawlada haddii aadan ku qancin qiimeynta cunugaaga ee uu sameeyay dugsiga degmadaada, iyada oo la raacayo shuruudaha soo socda:

1. Haddii aad codsatid qiimeyn waxbarasho oo madax banaan oo ilmahaaga laga bixinaayo kharashaadka dawlada, degmadaadu waa inay, iyadoon sameyn wax dib u dhac ah, waa inuu: (a) Soo gudbisaa cabashada habraaca cadaaladeed si aad u codsatid dhagaysiga aadna u muujisid in qiimaynta ilmahaagu ay munaasib tahay; ama (b) Bixiyo qiimeynta waxbarashada madaxa banaan iyadoo laga bixinayo kharashaadka dawlada, ilaa ay dugsiga degmadu ku muujiso dhageysi ah in qiimeynta cunugaaga ee aad soo heshay uusan ka soo bixin shuruudaha dugsiga degmada.
2. Haddii dugsiga degmadaadu ay codsato dhagaysiga dacwada go'aanka ugu dambeeyana uu yahay in qiimaynta dugsiga degmadu ee ilmahaaga tahay mid ku habboon, wali waxaad xaq u leedahay qiimeyn waxbarasho oo madax banaan, laakiin xaq uma lihid kharashaadka dawlada.
3. Haddii aad codsatid qiimeynta Madaxa banaan ee Waxbarashada cunugaaga, dugsiga degmadu waxa uu ku weydiin kartaa sababta aad u diidan tahay qiimeynta cunugaaga ee ay sameysay degmadu. Hase yeeshee, dugsiga degmadaada waxaa laga yaabaa inuusan u baahnayn sharaxaad waxaana laga yaabaa in si aan macquul ahayn dib u dhigin midkoodba bixinta qiimaynta waxbarashada madaxa bannaan ee ilmahaaga iyadoo laga qaadayo kharashaadka dawlada ama soo gudbinta cabashada habraaca cadaaladda si loo codsado dhagaysiga nidaamka ilaaalinta xuquuqda si loo difaaco qiimaynta degmada ee cunugaaga.

Waxaad u qalantaaa hal qiimeyn oo waxbarasho oo madax banaan oo loogu talagalay cunugaaga kharashaadka dowladu bixiso markasta oo dugsiga degmadaadu ay sameyso qiimeynta cunugaaga oo aadan ku raacsaneyn.

Qiimeynta ay Waalidku bilaabeen

Haddii aad sameyso qiimeynta Madaxa banaan ee Waxbarashada ee cunugaaga adoo adeegsanaaya kharashaadka dawlada ama aad la wadaagto degmada dugsiga qiimeynta canuggaaga oo aad ku soo heshay kharash gaar ah:

1. Dugsiga degmadaada waxaa qasab ah inuu tixgeliyo natiijada qiimeynta cunugaaga, haddii uu kasoo baxo shuruudaha qiimeynta Madaxa banaan ee Waxbarashada dugsiga degmada, go'aan kasta oo la gaaro marka la eego ree appropriate public education (bixinta waxbarasho dowladeed habboon oo bilaash ah) (FAPE) uuna helo cunuggaaga; **iyo**
2. Adiga ama degmadaaduba waxaad qiimeynta u isticmaali kartaan caddeymo ahaan dhagaysiga nidaamka jira oo quseeya cunugaaga.

Codsiyada qiimeynta ay codsadaan garsoorayaasha dhageysiga dacwada

Haddii garsooraha dacwada uu codsado qiimeynta Madaxa banaan ee Waxbarashada cunugaaga si ay qayb oga noqoto dhegeysiga nidaamka jira, kharashaadka qiimeynta waxaa qasab ah inay bixiso hay'ad dowli ah.

Shuruudaha dugsiga degmada

Haddii qiimaynta waxbarashadda madaxa banaan uu yahay mid lagu bixinaayo kharashaadka dawlada, shuruudaha lagu qiimeenaayo qiimaynta, oo ay ku jiraan goobta qiimaynta iyo qibrada uu leeyahay qofka qaadaya imtixaanka, waa inay la mid ahaadaan shuruudaha ay degmadu isticmaasho marka ay bilaabayaan qiimaynta (illaa heerka ay shuruudahaasi la jaan qaadayaan xaquuqda aad u leedahay qiimeyn waxbarasho oo madax bannaan).

Marka laga reebo shuruudaha kor lagu xusay, dugsiga degmada waxaa laga yaabaa inuusan soo rogin shuruudo ama jadwalo la xariira helitaanka qiimeyn waxbarasho oo madax banaan iyadoo lagu bixinaayo kharashka dawlada.

ILAALINTA MACLUUMAADKA

QEEXITAANADA

34 CFR §300.611

Sida loogu adeegsaday ciwaanka Macluumaadka Qarsoodiga ah hoostiisa:

- *Burburinta* micnaheedu waa baabi'inta jirka ama ka saarista waxyaabaha shaqsiyada lagu aqoonsado macluumaadkiisa si macluumaadka mar dambe shaqsi ahaan aan lagu aqoonsan.
- *Diiwaanada waxbarashada* waxaa loola jeedaa waa nooca diiwaanada lagu qeexay "diiwaanada waxbarashada" ee 34 CFR Qaybta 99 (qawaaniinta fulinta Family Educational Rights and Privacy Act (Xaquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Mida Sharciga Gaarka ah ee) 1974, 20 U.S.C. 1232g (FERPA)).
- *Hay'ada ka qeybqaadata* waxaa loola jeedaa waa degmo dugsiyeed kasta, wakaalad ama hay'ad soo aruurisa, haysa ama isticmaasha macluumaad shaqsiga lagu aqoonsan karo, ama lagu helib karo macluumaadkiisa, hoosna yimaada Qeybta B ee IDEA.

AQOONSIGA SHAQSIYAADKA

34 CFR §300.32

Aqoonsiga Shaqsiyaadka waxaa loola jeedaa macluumaaad ay kujiraan:

(a) Magaca cunugaaga, magacaaga waalid ahaan, ama magaca xubin kale oo katirsan qoyska;

(b) Ciwaanka cunugaaga;

(c) Waxyaabaha aqoonsan kara qofka, sida lambarka adeega bulshada ee cunugaaga ama lambarka ardaynimada; ***ama***

(d) Liiska dabeecada shaqsiga ama macluumaad kale oo suurtagalka ka dhigaaya in la aqoonsado ilmahaaga si macquul ah.

OGEYSIIS LOO DIRO WAALIDIINTA

34 CFR §300.612

Wakaaladda Waxbarashada Gobolku waa inay bixisaa ogeysiis ku filan inay si buuxda ugu wargaliso waalidiinta waxyaabaha ku saabsan ilaalinta macluumaadka shaqsiga lagu garan karo, oo ay ku jiraan:

1. Tilmaamahaa ilaa xadka ogeysiiska lagu siinaayo luuqadaha hooyo ee kooxaha kala duwan ee dadweynaha Gobolka;
2. Tilmaamaha ilmaha ee ku aadan macluumaadka shaqsiga lagu garan karo, noocyada macluumaadka la raadinaayo, qaababka Gobolka uu damacsan yahay inuu u isticmaalo soo aruurinta macluumaadka (oo ay kamid yihiin ilaha laga soo aruuriyay macluumaadka), iyo sida loo adeegsan doono macluumaadka;
3. Soo koobida shuruudaha iyo nidaamka ay tahay inay marto wakaaladaha kaqeyb galaaya arimaha la xariira kaydinta, usii gudbinta qaybaha saddexaad, haynta, iyo baabi'inta macluumaadka shaqsiga lagu aqoonsan karo; **iyo**
4. Qeexida dhamaan xaquuqaha waalidiinta iyo carruurta ee la xariira macluumaadkaan, oo ay kujiraan xaquuqaha hoos yimaada Family Educational Rights and Privacy Act (Xaquuqda Waxbarshada Qoyska iyo Qaanuunka Arrimaha Gaarka ah) (FERPA) iyo qawaaniinta fulinta ee 34 CFR Qaybta 99.

Kahor inta aan la aqoonsan qayb wayn oo kamid ah, sida goobta, ama aan la sameen qiimeenta waxbarashadda gaarka ah ee cunuga u baahan yahay iyo adeegyada la xariira (oo sidoo kale loo yaqaan "raadinta cunuga"), ogeysiiska waa in lagu soo daabacaa ama lagu shaaciyaa joornaalada ama warbaahinta kale, ama labadaba, ayadoo la sameenaayo wareeg ku filan si loogu wargaliyo dhamaaan waalidiinta Gobolka howlahaan ay ka jiraan.

HELITAANKA XAQUUQAHA

34 CFR §300.613

Hay'ada kaqeybqaadanaysa waxaa qasab ah inay kuu oggolaato inaad baartid oo aad dib u eegis ku samayso diiwaan kasta oo waxbarasho ee la xariira ilmahaaga lana soo aruuriyay, la ilaaliyay, ama ay isticmaashay degmadaadu sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA. Hay'ada kaqaybgalaysa waxaa qasab ah inay u hogaansanto codsigaaaga dib u eegista diiwaanada waxbarashada ilmahaaga ayadoon sameyn wax daahitaan aan muhiim ahayn kahor kulan kasta oo quseeya individualized education program (barnaamijka waxbarashada shaqsiyaadka) (IEP), ama dhagaysiga dacwad kasta oo ku dhisan cadaalad (oo ay kujirto kulanka dib u xalinta ama dhageysiga la xaariira anshax marinta), iyo in kiisku uusan ka badan 45 maalmood kadib marka aad codsatid.

Xaquuqdaada dib u eegista iyo dulmarka diiwaanad waxbarashada waxaa ka mid ah:

1. Xaqa aad u leedahay inaad jawaab celin kaheshid hay'ada kaqaybqaadata codsiyadaada macquulka ah ee sharaxaadda iyo tarjumaadda diiwaannada;
2. Xaqa aad u leedahay inaaad hay'ada qaybta ka ah aad waydiisan karo inay ku siiso koobiga diiwaanada haddii aadan si hufan u baari kareyn una eegi karin diiwaanada ilaa aad heshid koobiyadaas mahee; **iyo**
3. Xaq aad u leedahay inaad hesho qof wakiil kaaga ah dib u eegista iyo dulmarka diiwaanada waxbarashada.

Hay'ada kaqeybqaadata waxay u qaadan kartaa inaad awood u leedahay inaad eegtid oo aad dib u eegto diiwaanada la xariira ilmahaaga ilaa ay kugula taliso inaadan awood u laheyn sida ku xusan sharciga Gobolka ee quseeya arrimaha sida mas'uuliyadda, kala taga, iyo furitaanka.

HELITAANKA DIIWAANKA

34 CFR §300.614

Hay'ad kasta oo kaqeybqaadata waa inay haysato diiwaanada dhinacyada heelaya marin u helista diiwaannada waxbarasho ee la soo aruuriyay, la hayo, ama loo adeegsaday Qeybta B ee IDEA (marka laga reebo marin u helitaanka waalidiinta iyo shaqaalaha ee wakaaladda ka qeybqaadanaysa), oo uu kujiro magaca kooxda, taariikhda oggolaanshaha la siiyay, iyo ujeedada loo oggolaaday in kooxdu a adeegsado diiwaannada.

DIIWAANADA WIXII KABADAN HAL CUNUG

34 CFR §300.615

Haddii uu jiro diiwaan waxbarasho oo ay kujiraan macluumaad ka badan hal cunug, waalidiinta caruurtaas waxay xaq u leeyihiin inay baaraan oo ay eegaan kaliya macluumaadka la xariira ilmahooda ama in lagu wargeliyo macluumaadkaas gaarka ah.

NOOCYADA MACLUUMAADKA IYO LIISKA GOOBAHA

34 CFR §300.616

Kadib marka aad codsatid, hay'ad kasta oo kaqeybqaadata waxaa qasan ah inay ku siiso liiska noocyada iyo goobaha diiwaanada waxbarashada la soo aruuriyay, la hayo, ama ay adeegsato hay'adu.

KHARASHAADKA

34 CFR §300.617

Hay'ad kasta oo kaqeyb qaadanaysa waxaa laga yabaa inay ku waydiiso kharashaadka koobiyada diiwaanada ee adiga loogu sameeyay kuna salaysan Qeybta B ee IDEA, haddii kharashaadka aysan si dhab ah kaaga hor istaagin inaad isticmaasho xaquuqdaada inaad fiiriso aadna dib u eegto diiwaannadaas.

Hay'ada kaqeybqaadata waxaa laga yaabaa inaysan ku waydiinin kharashaadka baarista ama dib u soo celinta macluumaadka sida ay qabto Qaybta B ee IDEA.

CODSIGA WAALIDKA EE KU SAABSAN WAX KA BADELIDA DIIWAANADA

34 CFR §300.618

Haddii aad aaminsantahay macluumaadka diiwaanada ee la xariira ilmahaaga ee la aruuriyay, la kaydiyay, ama loo isticmaalay Qaybta B ee IDEA inuu yahay mid aan saxneen, marin habaabina ah, ama ku xad gudubay asturnaanta ama xaquuqaha kale ee ilmahaaga, waxaad hay'ada kaqaybgalaysa ka codsan kartaa inay dhowrto ayna badesho macluumaadka.

Hay'ada kaqaybta ah waxaa qasab ah inay go'aamiso haddii la baddelaayo macluumaadka oo la raacaayo codsigaaga muddo macquul ah gudaheed oo kadib marka aad gudbiso codsigaaga.

Haddii hay'ada kaqayb galaysa ay diido inay badesho macluumaadka kadib codsigaaga, waxaa qasab ah inay kula socodsiiso diidmadeeda kugulana taliso xaqa aad u leedahay dhageysiga sida lagu qeexay ciwaanka ***Fursada Dhageysiga dacwada.***

FURSADA DHAGEYSIGA DACWADA

34 CFR §300.619

Hay'ada kaqeybqaadaneyso waa inay, markay codsato, inay ku siiso fursad dhageysi si looga doodo macluumaadka diiwaanada waxbarashada ee la xariira cunugaaga si loo hubiyo inaysan khaldanayn, marin habaabin ahayn, ama haddii kale aysan xadgudub ku ahayn asturnaanta ama xaquuqaha kale ee cunugaaga.

NIDAAMKA DHAGEYSIGA DACWADA

34 CFR §300.621

Dhageysiga si looga doodo macluumaadka diiwaanada waxbarashada waa in la qabtaa iyada oo la raacaayo habraacyada dhageysiyada noocaan ah ee hoos yimaadaa Family Educational Rights and Privacy Act (Sharciga Xaquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Qaanuunka Arrimaha Gaarka ah) (FERPA).

NATIIJADA DHAGEYSIGA DACWADA

34 CFR §300.620

Haddii, natiijada dhagaysiga, wakaaladda kaqaybqaadata go'aaminta in macluumaadku khaldan yahay, marin habaabsan yahay ama haddii uu yahay mid ku xadgudbaaya asturnaanta ama xaquuqaha kale ee cunugaaga, waa inay baddelaan macluumaadka sida ugu habboon oo ay kugu wargeliyaan qoraal ahaan.

Haddii, natiijada dhagaysiga, wakaalada kaqaybgalaysa ay go'aansato in macluumaadku aanu sax ahayn, mid marin habaabin ah, ama haddii kale ku xadgudbaayo asturnaanta ama xaquuqaha kale ee canugaaga, waa inay kuu sheegaan xaqa aad u leedahay in lagu qoro diiwaannada in waxay ku sii haysaa canuggaaga qoraal ka faaloonaya macluumaadka ama bixinaaya sabab kastoo aadan ku raacsaneyn go'aanka hay'adda kaqeyb qaadatay.

Sharaxaadaas oo kale ee lagu qoray diiwaanada ilmaha waxaa qasab ah:

1. Inay wakaaladda kaqaybqaata dacwada ay ilaaliso diiwaannada cunugaagu illaa iyo inta diiwaanka ama qaybta la isku haysto ay hay'adu noqonaayo mid badqab leh; **iyo**
2. Haddi hay'adaha ka qaybqaata ay soo bandhigaan diiwaanada cunugaagu ama ay la wadagaan qolyo kale, waxaa qasab ah kooxdaas ay sharaxaad ka bixiso.

OGGOLAANSHAHA SOO BANDHIGIDA MACLUUMAADKA AQOONSIGA SHAQSI AHAAN.

34 CFR §300.622

Ilaa moyee in macluumaadku yahay mid diiwaanada waxbarasho kakooban, macluumaadka lasoo bandhigaayo ayadoo wax oggolaanshaha Waalidka la helin sida uu qabo Family Educational Rights and Privacy Act (Xaquuqda Waxbarashada Waalidka iyo Xeerka Ilalinta)(FERPA), waxaa qasab ah in la helo oggolaaanshahaaga kahor inta aan lasoo bandhigin macluumaadk rasmiga ah lasoo bandhigin dhinacyada kale ee hay'adaha ka qaybgalaaya. Ilaa inay jirto mahee xaaladaha lagu xusay hoos, oggolaansho lagaama doonaayo kahor inta macluumaadka shaqsiga lala wadaagin dhinacyada kale ee rasmiga ah ee ku salaysan shuruudaha kulanka Qaybta B ee IDEA.

Oggolaanshahaaga ama oggolaanshaha cunuga u qalmo ee gaaray da'da wayn marka loo eego xeerka Gobalka, waxaa qasab ah in la helo kahor inta aan si rasmi ah lasoo bandhigin macluumaadka shaqsiga lalana wadaagin hay'adaha kaqaybgalaaya ama bixinaaya adeegyada kala guurka.

Haddii cunugaagu kujiro ama laga qori doono, dugsiyada gaarka loo leeyahay ee aan ku oolin isla degmada aad kunooshahay, waxaa qasab ah in marka koowaad lahelo oggolaanshahaaga kahor inta aan si rasmi ah loogu bandhigin dugsiga dadwaynaha macluumaadka cunugaaga sida halka uu kuyaalo dugsiga gaarka loo leeyahay iyo dugsiga rasmiga ah ee dadwaynha kuna yaala meesha aad ku nooshahay.

ILAALOOYINKA

34 CFR §300.623

Hay'ad kasta oo kaqaybqaadanaysa waxaa qasab ku ah inay ilaaliso macluumaadka la aqoonsan karo intaqa lagu gudo jiro marxaladaha aruurinta, kaydinta ama soo bandhigida.

Hal wakaalad oo caalamau ah oo ka tirsan qeybqaatayaasha waa inay qaadato mas'uuliyadda hubinta sirta macluumaadka wixii macluumaad shaqsi ee la aqoon karo.

Dhamaan dadka aruurinaaya ama adeegsanaaya macluumaadka shaqsiga lagu garan karo waa inay helaan tababar ama tilmaamo ku saabsan siyaasadaha Gobolka iyo qawaaniinta ku salaysan arimaha qarsoodiga ah ee hoos yimaada Qaybta B ee IDEA iyo Family Educational Rights and Privacy Act (Sharciga Xaquuqda iyo Xaquuqda Waxbarashada Qoyska) (FERPA).

Hay'ad kasta oo katirsan kaqaybgalayaasha waxaa qasab ah inay ilaaliso, ayna dadwaynaha la wadaagin, liiska hadda ee magacyada iyo shaqaalaha ee ka shaqeeya hay'ada ee laga yaabo inay helaan macluumaadka shaqsiyaadka.

BURBURINTA MACLUUMAADKA

34 CFR §300.624

Dugsiga degmadaada waxaa qasab ah inuu kula socodsiiyo marka la aruuriyo, la kaydiyo ee macluumaad shaqsiga, ama marka adeega Qayba B ee IDEA aan dib danbe loogu baahanayn in loo isticmaalo waxbarashada ilmahaaga.

Macluumaadka waxaa qasab ah in la tirtiro kadib marka aad codsatid. Hase yeeshee, diiwaanka joogtada ah ee magacaga cunugaaga, ciwaankaaga, taleefoon lambarkaaga, heerka uu dhigto/dhigato ilmaha, diiwaanka xaadirista, fasalada ay kaqaybqaadato, heerarka cunugaaga uu ka gudbay, iyo sanadka uu ka gudbay waxaa laga yaabaa in lasii hayo ayadoo waqti lagu xadideen.

NIDAAMYADA CABASHADA GOBALKA

FARQIGA U DHAXEEYA NIDAAMYADA DHAGEYSIGA DACWADA EE JIRA AMA KAN CABASHOOYINKA GOBALKA

Xeerarka Qaybta B ee IDEA ee nidaamyada afarta qaybood kuna salaysan cabashooyinka Gobalka iyo dhageysiga cabashada Dacwada. Sida hoosba lagu sharaxay, shaqsi iyo urur kasta waxa uu soo gudbinta Cabashada Gobalka ee ku salaysan eedaha ku xadgudubka shuruudaha Qaybta B ayadoo loo maraayo dugsiga degmada, State Educational Agency (Wakaalada Waxbarashada Gobalka), ama hay'ad kale oo kasta oo dadwayne. Adiga kaliya ama dugsiga degmada waxaad soo gudbin kartaan cabasho habsami u socodka arin kasta oo la xariirta soo jeedinta ama diidmada in la bilaabo ama la badelo aqoonsiga, qiimaynta ama meelaynta waxbarashada ilmaha qaba naafonimada, ama free appropriate public education (bixinta waxbarasho guud oo habboon oo bilaash ah) (FAPE) uuna helaayo cunug. Inkastoo shaqaalaha State Educational Agency (Wakaaladda Waxbarashada Gobolka) dhamaantood ay tahay inay ku xalliyaan cabashada Gobolka 60 maalmood gudahood, haddii aan si sax ah loo kordhin, garsooraha dhageysiga eex la'aanta ah waa inuu dhageystaa cabashada nidaamka jira (haddii aan lagu xallin karo kulanka xallinta ama dhexdhexaadinta.) oo lagu soo saaro go'aan qoraal ah muddo 45 maalmood gudahood ah kadib dhammaadka muddada xallinta, sida lagu sharaxay dukumiintigaan ee Cinwaanka Nidaamka Xallinta, ilaa garsooraha dhageysigu bixiyo mooyee waqti cayiman oo codsigaaga ama codsiga degmo dugsiyeedka loogu talagalay. Nidaamka Cabashada dacwada ee Gobalka, dib u xalinta iyo habka dhageysiga Dacwada waxaa lagu qeexay hoos. State Educational Agency (Wakaalada Waxbarashada Gobalka) waxaa qasab ah inay soo diyaariso foomamka qaababka si ay kaaga caawiso sidaad u soo gudbin lahayd cabashada Dacwada sidoo kale adiga ama kooxaha kale oga caawin lahaayeen cabashada Gobalka sida hoos loogu qeexay ***Qaabka Foomamka.***

QAADASHADA NIDAAMKA CABASHADA GOBALKA

34 CFR §300.151

Guud ahaan

State Educational Agency (Wakaalad Waxbarashada Gobolka) Kastawaxaa qasab ah inay haysataan nidaamyo habraac oo qoran looguna talagalay:

1. In lagu xaliyo cabasho kasta, oo ay kujiraan cabashada ay soogudbiyeen urur ama gobal kale ama shaqsi;
2. Soo gudbinta cabashada Wakaalada Waxbarashada Gobolka;
3. Baahinta nidaamka cabashada Gobolka ee waalidiinta iyo shakhsiyaadka kale ee daneenaaya, oo ay kujirto tababarka waalidiinta iyo xarumaha macluumaadka, ilaalinta iyo wakaaladaha u doodista, xarumaha daganaashaha madaxa banaan, iyo hay'adaha kale ee ku habboon.

Daawooyinka la diiday ee adeegyada ku habboon

Xalinta cabashada Gobolka oo State Educational Agency (Wakaaladda Waxbarashada Gobolka) ay ku guuldareysatay inay bxisio adeegyo munaasib ah, State Educational Agency (Wakaaladda Waxbarashada Gobolka) waa inay wax ka qabataa:

1. Ka gaabinta bixinta adeegyo munaasib ah, oo ay kujiraaan tallaabada sixitaanka oo ku habboon in wax laga qabto baahiyaha ilmaha (sida adeegyada magdhowga ama magdhawga lacagta); **iyo**
2. Bixinta adeegyo habboon ee mustaqbalka ee dhammaan carruurta naafada ah.

NIDAAMYADA UGU YAR EE CABASHADA GOBALKA

34 CFR §300.152

Waqtiga ay ku egtahay; Nidaamyada ugu hooseeya

Hay'ad kasta oo waxbarashadda Gobolku waa inay ku dartaa nidaamka cabashadda ee Gobolka waqti xaddidan oo ah 60 maalmood laga bilaabo maalinta cabashada loo gudbiyo:

1. Samee baaritaan madax banaan oo aad ku sameenaysid goobta, haddii Wakaaladda Waxbarashada Gobolku go'aamiso in baaritaanka loo baahan yahay;
2. Sii dacwoodaha fursad dheeraad ah oo kusoo gudbiyo macluumaad dheeraad ah, mid qoran ama mid cod ahba, kuna salaysan eedaymaha dacwada;
3. Sii dugsiga degmada ama hay'ad kale oo dawli ah fursad ay kaga jawaabaan cabashada dacwada, oo ay ku jiraan, ugu yaraan: (a) ikhtiyaarka wakaaladda, soo jeedin lagu xalinaayo cabashada; **iyo** (b) fursad loogu talagalay waalidka soo gudbiyay cabashada iyo wakaaladdu inay si iskood ah ugu heshiiyaan inay dhexgalaan dhexdhexaadinta;
4. Dib u eegida dhammaan macluumaadka la xariira go'aanada madaxa banaan sida degmada dugsi ama hay'ad kale oo dawladeed oo jabineysa shuruudaha Qeybta B ee IDEA; **iyo**
5. Bixiyaan go'aan qoraal ah ku salaysan qofka cabanaya kana hadlaaya eedeymo kasta oo cabasho ayna kujiraan: (a) xaqiiqooyinka helida iyo gabagabada; **iyo** (b) sababaha go'aanka kama dambaysta ah ee State Educational Agency (Wakaaladda Waxbarashada Gobolka).

Muddo kordhinta; fulinta; go'aanka ugu danbeeya

Nidaamka kor lagu qeexay ee Waxbarashada Wakaalada Gobalka waxaa qasab ah:

1. Oggolaado kordhinta 60 ka maalmood ee xaddidan oo kaliya haddii: (a) duruufaha gaarka ah oo jira oo la xariira cabashada Gobalka gaarka ah; **ama** (b) adiga iyo degmo dugsiyeedka ama hay'ad kale oo dawli ah oo ku lug leh hawlaha iskaa wax u qabso aad ku heshiisaan in la dheereeyo waqtiga lagu xalinaayo arrinta iyada oo loo maraaayo dhexdhexaadin ama qaab kale oo lagu xalinaayo khilaafaadka, haddii laga helo Gobolka.
2. Oo ay kujiraan nidaaamyada loogu talagalay hirgelinta wax ku oolka ah go'aanka State Educational Agency' (Hay'adda Waxbarashada Gobolka) ee go'aanka kama dambeysta ah, haddii loo baahdo, oo ay kujiraan: (a) hawlaha caawimaada farsamada; (b) gorgortanyada; **iyo** (c) talaabooyinka sixitaanka si loo gaaro u hogaansanaanta.

Cabashooyinka gobolka iyo dhageysiga nidaamka ee xaquuqda dacwada

Haddii la helo cabashada qoran ee Gobolka taas oo sidoo kale ah mowduuca dhageysiga nidaamka dacwada xaquuq dhowrista dacwada sida lagu qeexay hoosta ciwaanka ***Cabashada Dacwad Cadaalada*** oo sharci ah, ama cabashada Gobolka waxaa ku jira arrimo badan oo mid ama in ka badan ay qeyb ka yihiin dhageysiga noocaas ah, Gobolka waa inuu meel dhigaa qayb kasta oo kamid ah cabashada Gobolka ee looga hadlay dhageysiga nidaamka xuquuq dacwada dhowrista ilaa dhagaysigu ka dhammaanayo. Arrin kasta oo ku jirta cabashada Gobolka ee aan kamid ahayn dhageysiga nidaamka xaquuq dacwada dhowrista waa in lagu xaliyaa iyadoo la isticmaalaayo waqtiga xaddidan iyo habraacyada aan kor ku soo sheegnay.

Haddii arrinta looga hadlo cabashada Gobolka waxaa horay loogu go'aamiyay dhageysiga nidaamka xaquuq dacwada dhowrista oo ay ku lug leeyihiin isla dhinacyadaas (tusaale ahaan, adiga iyo degmada dugsiga), markaa sgo'aanka dhageysiga nidaamka xaquuq dacwada dhowrista ayaa ku xusan arrintaas oo Wakaaladda Waxbarashada Gobolku waa inay wargeliyaan dacwoodaha in go'aanka uu yahay mid dhaqan galaaya.

Dacwada la sheegay in dugsiga degmadu ama wakaalad kale oo dawladeed ku guuldaraysatay inay fuliso go'aanka dhagaysiga nidaamka jira waa inay xalisaa State Educational Agency (Wakaalada Waxbarashada Gobolka).

SOO GUDBINTA CABASHADA GOBALKA

34 CFR §300.153

Ururada iyo shaqsiyaadka waxay soo gudbin karaan cabashada Gobalka ee qoran ayagoo raacaaya nidaamyada kor lagu xusay.

Dacwada Gobalka waxaa qasab ah inay la socdaan:

1. Bayaanka dugsiga ee degmo ama hay'ad kale oo dawladeed ay ku xadgudbeen shuruudaha Qeybta B ee IDEA ama qawaaniinta fulinta ee 34 CFR Qaybta 300;

2. Xaqiiqooyinka uu ku salaysanyahay bayaanka;
3. Saxiixa iyo macluumaadka lagala xariiraayo kooxda soo gudbinaysa dacwada; iyo
4. Haddii lagu eedeynaayo xadgudubyo la xariira ilmo gaar ah:
   (a) Magaca iyo ciwaanka cunuga uu degan yahay;
   (b) Magac dugsiga uu dhigto cunuga;
   (c) Xaalada cunuga ee la xariira guri la'aanta ama dhalinyarada, macluumaad lagala xariiri karo ilmaha, iyo magaca dugsiga ilmuhu dhigto;
   (d) Qeexida waxa keenay dhibaatada cunuga, oo ay kujiraan waxyaabaha xariirka la leh dhibaatada; **iyo**
   (e) Xalinta dhibaatada ee la soo jeediyay illaa iyo inta la ogyahay oo ay heli karto kooxda soo gudbisa cabashada waqtiga cabashada lasoo gudbiyay.

Dacwadu waa inay soo bandhigtaa xad gudub dhacay wax aan ka badnayn hal sano kahor taariikhda cabashada la helay sida lagu sharaxay ciwaanka ***Nidaamyada Cabashada Ee Gobolka.***

Kooxda soo gudbinaysa dacwada gobalka waxaa sidoo kale qasab ah inay koobi u dirto dugsiga degmada ama wakaalada dadwaynaha ee markaas gacanta ku haysta ilmaha isla waqtiga ay kooxdu cabashadda u gudbineyso Wakaaladda Waxbarashada Gobolka.

NIDAAMYADA CABASHADA AYADOO LA ADEEGSANAAYO SHARCIGA JIRA

SOO GUDBINTA CABASHADA SHARCIGA

34 CFR §300.507

Guud ahaan

Adiga ama degmadu waxaad soo gudbin kartaan cabasho habsami u socodka arin kasta oo la xariirta soo jeedinta ama diidmada in la bilaabo ama la badelo aqoonsiga, qiimaynta ama meelaynta waxbarashada ilmahaaga, ama free appropriate public education (bixinta waxbarasho guud oo habboon oo bilaash ah) (FAPE) uuna helaayo ilmahaaga.

Cabashada nidaamka xaquuq dhowrka leh waa inuu soo gudbiyo xadgudubka dhacay wax aan ka badneyn labo sano kahor inta aadan adiga ama degmadaadu ogaanin ama ay aheyd inaad ogaataan ficilka la soo sheegay oo aasaaska u ah cabashada nidaamka jira.

Waqtiga kor kuqoran laguuma eegaayo adiga haddii aadan kusoo gudbin karin cabashada nidaamka xaquuqda dhowrka isla waqtigaas inta lagu gudo jiro sababtoo ah:

1. Degmadu waxay si qalad ah u beenisay inay xallisay arrimaha cabashada lagu sheegay; **ama**
2. Degmadu waxay kaa joojisay macluumaadka adiga lagaa rabey inay ku siiso sida uu qabo Qaybta B ee IDEA.

Macluumaadka loogu talagalay Waalidiinta

Dugsiga degmada waxaa qasab ah inay kusoo ogeysiiso arimaha la xariira sharciyada kharashaadka ama qiimaha hooseeya iyo adeegyafa kale ee la xariira oo laga heli karo aaga haddii aad codsato macluumaadka, ama haddii adiga ama degmadu aad soo gudbisaan cabasho habraac sharciyeedka.

CABASHADA NIDAAMKA EE JIRA

34 CFR §300.508

Guud ahaan

Si aad u codsatid dhageysiga dacwada, adiga iyo dugsiga degmada (ama qareenkaada ama qareenka dugsiga degmada) waxaa qasab ah inay soo gudbiyaan cabashada habraaca cadaaladeed ee dhinaca kale. Cabashadaa waa inay kujiraan dhamaan mawduucyada hoos kuqoran lagana dhigo mid qarsoodi ah.

Cid kasta oo soo gudbinaysa cabasho waxaa sidoo kale qasab ah ku ah inay siiso State Educational Agency (Hay'ada Waxbarashada Gobalka) nuqul kamid ah cabashada.

Waxyaabaha cabashadu ay ka kooban tahay

Cabashada habraaca cadaaladeed waa inay kujirtaa:

1. Magaca cunuga;
2. Ciwaanka uu degan yahay ee cunuga;
3. Magaca dugsiga eecunuga;
4. Haddii ilmahu yahay cunug ama dhalinyaro guri la'aan ah, meelaha lagala xariiraayo macluumaadkacunuga iyo magaca dugsiga ilmaha;
5. Qeexida waxa keenay dhibaatada ilmaha ee la xariira soojeedinta ama diidmada, oo ay kujiraan waxyaabaha xariirka la leh dhibaatada; **iyo**
6. Xalinta dhibaatada ee la soo jeediyay illaa iyo inta la ogyahay oo ay heli karto kooxda soo gudbinaysa cabashada (adiga iyo dugsiga degmada) ee waqtigaas.

Ogeysiis ayaa loo baahan yahay ka hor dhageysiga dacwada cadaalada oo sharci ah

Adiga ama dugsiga degmadama yeelan kartaan dhageysi ku salaysan nidaamka xaquuq dhowrka leh illaa adiga ama dugsiga degmada (ama qareenkaaga ama qareenka dugsiga ee degmada) aad soo gudbisaan Cabashada sharciga ee habraaca cadaalada oo ayna kujiraan macluumaadka kor lagu qoray.

Isku filnaanshaha cabashada

Si nidaamka habraaca cabashada Sharciga loo tixgeliyo, waxaa qasab ah in cabashadu tahay mid ku filan. Dacwada nidaamka xaquuq dhowrka leh waxaa loo qadarin doonaa inay ku filan tahay (inay la kulanto waxa looga baahan yahay waxyaabaha kore ee kor ku xusan) haddii kooxda helaysa cabashada nidaamka xaquuq dhowrka leh (adiga ama dugsiga degmada) uusan ku ogeysiinin garsooraha dhageysiga iyo qeybta kale qoraal ahaan ah, 15 maalmood gudahood taariikhda helitaanka dacwada, in kooxda heleysa ay aaminsan tahay in cabashadda nidaamka xaquuq dhowrista leh aysan buuxin shuruudaha kor lagu soo sheegay.

Shan maalmood oo ah maalmaha shaqada laga bilaabo maalinta la helo ogeysiiska in qeybta qaabilaada (adiga ama dugsiga degmada) u arkeysaan cabashada nidaamka jira inuusan ku filnayn, garsooraha dhageysiga waa inuu go'aamiyaa haddii cabashada nidaamka xaquuq dhowrka leh ay buuxineyso shuruudaha kor lagu soo qoraay, oo ay kugu wargeliyaan adiga iyo degmada dugsiga isla markiiba qoraal ahaan.

Wax ka badelida cabashada

Adiga ama degmada dugsi ayaa isbaddelo ku sameyn kara cabashada keliya haddii:

1. Kooxda kale ay si qoraal ah kusoo ansixiyaan lana idin siiyo fursad aad ku xallisaan cabashada habraaca cadaaladda iyadoo loo maraayo kulanka xallinta, ee hoos lagu sharaxay gaar ahaan ciwaanka ***Hannaanka Xallinta;*** **ama**
2. Waxa aan ka danbeen shan maalmood kahor inta uusan dhageysiga nidaamka xaquuq dhowrka leh bilaabmin, garsooraha dhageysiga dacwada ayaa fasaxaya rukhsadda isbaddelaada.

Haddii kooxda cabashada soo gudbisay sida (adiga ama dugsiga degmada) uu isbadelo ku sameeyo cabashada nidaamka xaquuq dhowrka leh, jadwalka kulanka xallinta muddo (15 maalmood gudahood laga bilaabo maalinta cabashada lasoo gudbiyay) iyo muddada xallinta (30 ka maalmood gudahood ah.) mar labaad biloow taariikhda cabashada wax laga baddelay.

Local educational agency (Wakaalada Maxaliga ah ee Waxbarashada) (LEA) ama jawaabta cabashada nidaamka degmada ee dugsiga

Haddii degmadu aysan kuu soo dirin ogeysiis hore oo qoraal ah, sida lagu qeexay ciwaanka ***Ogeysiiska Qoraalka Hore***, ee ku saabsan mowduuca ku jira cabashadaada nidaamka xaquuq dhowrka leh, degmadu waa inay, 10 maalmood gudahood taariikhda kadib helitaanka cabashada nidaamka xaquuq dhowrista leh, ay kusoo dirtaa jawaab ay la socdaan:

1. Sharaxaada sababta dugsiga degmada u sameeyay soojeedinta ama uu u diiday inuu sameeyo hawlaha lagu sheegay cabashada nidaamka sharciga;
2. Qeexida dookhyo kale oo kasta oo ku saabsan Kooxda tixgelinaysa barnaamijka waxbarashada gaarka ah (IEP), sababta dookhydaas loo diiday;
3. Tilmaamaha nidaamka qiimayn kasta, qiimeynta, diiwaanada, ama warbixinta dugsiga degmada ee loo adeegsado aasaaska talaabada la soo jeediyay ama la diiday; **iyo**
4. Qeexitaaanada waxyaaabaha kale ee quseeya hawlaha uu soo jeediyay dugsiga degmada ama uu diiday.

Bixinta macluumaadka qodobada 1-4 ee kor ku qoran kama hor istaagi karaan dugsiga degmadu inuu ku adkaysado cabashadaadii nidaamka cadaalada inuu ahaa mid aan ku filneyn.

Jawaabta kooxda kale ee ku aadan nidaamka cabashada

Marka laga reebo sida ku xusan ciwaanka hoose ee ciwaan hoosaadka kuyaala qaybta kore, ***Local educational agency*** **(*Wakaaladda waxbarashada maxalliga ah) (LEA) ama jawaabta dugsiga***

degmada ee ku salaysan cabashadda nidaamka jira, kooxda heleysa cabashada nidaamka xaquuq dhowrka ah waa in, muddo 10 maalmood gudahood ah laga bilaabo maalinta cabashada la helo, ay u diraan kooxda kale jawaabta si gaar ah uga hadlaysa cabashada.

QAAB FOOMAMKA

34 CFR §300.509

State Educational Agency (Wakaalada Waxbarashada Gobalka) waxaa qasab ah inay soo diyaariso foomamka qaababka si ay kaaga caawiso sidaad u soo gudbin lahayd cabashada Sharciga ee Jira sidoo kale adiga iyo kooxaha kale oga caawin lahaayeen cabashada Gobalka. Hase yeeshee, Gobolkaaga ama degmadaadu waxaa laga yaabaa inaysan u baahnayn adeegsiga foomamka noocan ah. Caadiyan, waxaad isticmaali kartaa habka foomka ama foom kale oo munaasib ah, haddii uu ka kooban yahay macluumaadka loo baahan yahay ee xareynta cabashada nidaamka xaquuq dhowrka leh ama cabashada Gobolka.

DHEXDHEXAADIN

34 CFR §300.506

Guud ahaan

Dugsiga degmada waxaa qasab ah inuu hormar ku sameeyo qaab socodyada dhex dhexaadinta ee diyaarka ah sidii adiga iyo dugsiga degmada u xalin lahaydeen khilaafyada ku lugta leh arrin kasta ee hoos timaadda Qeybta B ee IDEA, oo ay kujiraan arrimaha ka horreeya inta aan la xareyn cabashada nidaamka jira. Markaas oowgeed, dhexdhexaadinta ayaa loo heli karaa in lagu xaliyo khilaafaadka sida hoos timaada Qeybta B ee IDEA, haddii aad gudbisay iyo haddii aadanba gudbineyn cabashada habraaca cadaalada ah si aad u codsato dhageysiga nidaamka xaquuq dhowrista sida lagu qeexay hoosta ciwaanka ***Dacwada Cabashada Nidaamka Xaqa ah.***

Shuruudaha

Habraacyadu waa inay xaqiijiyaan in hanaanka dhexdhexaadinta:

1. Yahay mid ikhtiyaari ah dhankaaga iyo dhanka degmada dugsigaba;
2. Uusan noqon mid loo adeegsado in lagu inkiro ama lagu daahiyo xaqa aad u leedahay dhagaysiga dacwadaada, ama in lagu diido xaquuq kale oo kasta oo ku cad Qaybta B IDEA; **iyo**
3. Uu qabto dhexdhexaadinta dhexdhexaadiye khibrad u leh oo dhexdhexaad ah kaasoo tababar ku qaba farsamooyinka dhexdhexaadinta ee waxtarka leh.

Degmada dugsigu waxay abuuri kartaa habraacyo kuwaasoo siinaya waalidiinta iyo dugsiyada doorta inaysan adeegsan hanaanka dhexdhexaadinta, fursad ay ku kulmaan, waqti iyo goob adiggu aad ku qanci karto, kaasoo ay dhexdhexaadinayaan qolo aan kiiska wax door ah kulahayn:

1. Oo la shaqaysa haayad kale oo gaar ah oo ku haboon oo ka shaqaysa xalinta khilaafaadka, ama xarunta tababarka iyo xogta waalidka ama xarun bulsho oo xog siisa waalidiinta kuna dhex taala Gobalka; **iyo**
2. Kuwaasoo kuu sharxi doona faa'iidooyinka ku jira, dhiiri galinaayana adeegsiga, hanaanka dhexdhexaadinta.

Gobalku waa inuu haystaa liiska dadka khibrada u leh dhexdhexaadinta aqoontana u leh sharciyada iyo xeerarka la xariira bixinta adeegyada wax barashada gaarka ah iyo kuwa la xariira. State Educational Agency (Wakaalada Waxbarashada Gobalku) waa inay doorataa dhexdhexaadiyaasha ayadoo adeegsanayso hanaan qori tuur ah, meerto ah,ama qaab kale oo cadaalad ah.

Gobalka ayaa masuul ka ah qarashaadka hanaanka dhexdhexaadinta, ayna ku jiraan qarashaadka kulanada.

Kulan kasta oo la xariira hanaanka dhexdhexaadinta waa in jadwalkiisa loo qabtaa qaab waqti ahaan ku haboon laguna qabtaa goob aad ku wada qanacdaan adigga iyo degmada dugsigu.

Haddii adigga iyo degmada dugsigu ku xalisaan khilaafkiina hanaanka dhexdhexaadinta ah, labada dhinacba waa inaad gashaan heshiis sharci ah kaasoo cadaynaaya xalka la gaaray sheegaayana:

1. In dhammaan doodaha la yeeshay intuu socday hanaanka dhexdhexaadintu yihiin kuwo qarsoodi ah aana loo adeegsan karin cadayn ahaan dacwad kasta oo dhagaysigeeda lasii wado ama dacwad madani ah (kiiska maxkamada); **iyo**
2. Uu yahay mid ay saxiixeen adigga iyo wakiilka degmada dugsiga kaasoo awood u leh inuu heshiiska u saxiixo degmada dugsiga.

Heshiiska dhexdhexaadinta oo qoran, oo saxiixan waa mid sharciyan lagu fulin karo Maxkamada Gobalka ee dacwada kartida (oo ah maxkamad awood u leh si waafaqsan sharciga Gobalka dhagaysiga kiiska noocaan ah) ama maxkamad degmo oo ku talla Maraykanka.

Doodaha dhaca intii lagu jiray hanaanka dhexdhexaadinta waa inay ahaadaan kuwo qarsoodi ah. Looma adegsan karo inay cadayn u noqdaan dhagaysi dacwo oo mustaqbalka timaada ama dacwad madani ah oo lagu qaado maxkamad Federaal ama maxkamad Gobal oo caawimaad ka helaysa Qaybta B ee IDEA.

DHexdhexaadin Dhexdhexaadiyaha

Dhexdhexaadiyaha:

1. Ma noqon karo shaqaale u shaqeeya State Educational Agency (Wakaalada Waxbarashada ee Gobalka) ama degmada dugsiga e qaybta ka ah waxbarashada ama daryeelka cunugaaga; **iyo**
2. Waa inuusan lahayn masaalix shaqsi ah ama mid shaqo oo ka hor imaanaysa ujeedada dhexdhexaadiyaha.

Qof haddii kale u qalma inuu noqdo dhexdhexaadiye ma'aha shaqaale ka tirsan degmada dugsiga ama wakaalada Gobalka kaliya sabab la xariirta inuu mushaar ka qaato wakaalada ama degmada dugsiga si uu u noqdo dhexdhexaadiye.

HANAANKA XALINTA

34 CFR §300.510

Kulanka xalinta

15 maalmood gudahood kadib markay helayso ogaysiiskaaga dacwada cabashada ah, ka hor intaan dhagaysiga dacwadu bilaabmin, degmada dugsigu waa inay kugu qancisaa kulan ay kula qaadato adigga iyo xubin ama xubnaha arintu qusayso ee Kooxda barnaamijka wax barashada gaarka ah (IEP) kaasoo aqoon gaar ah u leh xaqiiqooyinka ku cad dacwadaada cabashada. Kulanka:

1. Waa inuu ka qaybgalaa wakiil ka socda degmada dugsiga kaasoo leh awood go'aan gaaris asagoo wakiil ka ah degmada dugsiga; **iyo**
2. Waa inuusan ka qaybgalin qareen kasocda degmada dugsiga ilaa inuu adiggana kula socdo maahee qareen.

Adigga iyo degmada dugsiga ayaa go'aaminaaya xubnayaasha arintaani qusayso ee katirsan Kooxda IEP da oo ka qayb galaaya kulanka.

Ujeedada kullanku waa inaad ka hadashaan dacwadaada cabashada ah, iyo xaqiiqooyink salka u ah dacwada cabashada, si markaas degmada dugsigu fursad ugu hesho xalinta khilaafka.

Kulanka xalintu qasab ma'aha haddii:

1. Adigga iyo degmada dugsiga aad ku heshiisaan si qoraal ah joojinta kullanka; **ama**
2. Adigga iyo degmada dugsigu ku heshiisaan inaad adeegsataan hanaanka dhexdhexaadinta, sida ku cad ciwaanka ***Dhexdhexaadinta***.

Mudada Xalinta

Haddii aan degmada dugsigu ku xalin dacwada cabashada si aad ku qanacdo 30 maalmood gudahood laga bilaabo markay hesho dacwada cabashada ah (oo ah inta lagu jiro mudada hanaanka xalinta khilaafka), hananaka dhagaysiga dacwada ayaa la samayn karaa.

Jadwalka 45 maalmood ee soo saarista go'aanka kama danbaysta ah ee dhagaysiga dacwada, sida ku cad ciwaanka, ***Go'aannada Dhagaysiga***, ayaa bilaabmaysa kadib markay dhamaato mudada 30

maalmood ee xalinta khilaafka loo cayimay, oo ay la socdaan kordhinada gaarka ah ee lagu sameeyay mudada xalinta ee 30 maalmood ah, sida hoos lagu qeexay.

Marka laga reebo markaad adigga iyo degmada dgsigu ku wada heshiisaan ka boodista hanaanka xalinta ama aad adeegsiga dhexdhexaadinta, hadaad imaan waydo kulanka xalinta waxay keenaysaa in dib u dhac ku yimaado jadwalada hanaanka xalinta iyo dhagaysiga dacwada ilaa kulanka la qabto.

Haddii kadib maray samayso dadaalo macquul ah ayna keento cadaynta dadaaladaas, oo ah in degmada dugsigu aysan awoodin inay kaa qaybgaliso kulanka dhexdhexaadinta ah, degmada dugsigu waxay, markay dhamaato mudada Xalinta oo 30-ka maalmood ah, codsan kartaa in sarkaalka dhagaysiga dacwadu baabi'iyo dacwadaada cabashada. Cadaymaha dadaalada noocaas ah waa inay ku jiraan diiwaanka iskudayada degmada dugsigu samaysay si ay u hesho heshiis laba geesood ah ood ka gaartaan waqtiga iyo goobta, sida:

1. Diwaannada faahfaahsan ee wicitaanada dhanka taleefanka ee la diray ama la isku dayay iyo natiijooyinka wicitaanadaas;
2. Koobiyada xariirada laguu soo diray iyo jawaabo kasta oo lagaa helay; iyo
3. Diiwaanada faahfaahsan ee booqashooyinka lagu tagay gurigaaga ama goobtaada shaqo iyo natiijooyinka kasoo baxay booqashooyinkaas.

Haddii degmada dugsigu ay ku fashilanto qabashada kulanka xalinta 15 maalmood gudahood kadib markuu soo gaaro ogaysiiska dacwada cabashada ah **ama** ay ku fashilanto ka qaybgalka kulanka xal radinta ah, waxaad ka dalban kartaa sarkaal dhagaysiga dacwada inuu bilaabo jadwalka hanaanka dhagaysiga dacwada ee 45 maalmood ah.

Kordhinta mudada Xalinta cabashada ee 30-ka maalmood ah

Haddii adigga iyo degmada dugsigu ku heshiisaan qoraal ahaan in meesha laga saaro kulanka xalinta khilaafka, markaas mudada u cayiman dhagaysiga dacwada cabashada ee 45 maalmood ah ayaa bilaabmaysa maalinta ku xigta.

Kadib marka dhexdhexaadinta ama kulanka xalinta bilaabmo iyo kahor dhamaadka 30 maalmood ee u cayiman xalinta khilaafka, haddii adigga iy degmada dugsigu ku heshiisaan qoraal ahaan in aysan suuragal ahayn inaad heshiisaan, markaas mudada u cayiman dhagaysiga dacwada cabashada ee 45 maalmood ah ayaa bilaabmaysa maalinta xigta.

Haddii adigga ama degmada dugsigu ogolaataan inaad adeegsataan hanaanka dhexdhexaadinta laakiin iinaan wali gaarin wax heshiis ah, markay dhamaato mudada Xalinta ee 30 maalmood ah hanaanka dhexdhexaadinta ayaa sii socon kara ilaa aad heshiis ka gaartaan haddii labada dhinacba ku heshiiyaan sii wadista dhexdhexaadinta si qoraal ah. Hase yeeshee, haddii adigga ama degmada dugsiga midkiin ka baxo hanaanka dhexdhexaadinta inta lagu jiro mudada sii wadista dhexdhexaadinta, markaas mudada u cayiman dhagaysiga dacwada cabashada ee 45 maalmood ah ayaa bilaabmaysa maalinta ku xigta.

Heshiiska xalinta khilaafka oo qoran

Haddii xal looga gaaro khilaafka kulanka xalinta ah, adigga iyo degmada dugsigu waa inaad gashaan heshiis sharci ah:

1. oo ah mid ay saxiixeen adigga iyo wakiilka degmada dugsiga kaasoo awood u leh inuu heshiiska u saxiixo degmada dugsiga; **iyo**
2. Ah mid ay fulin karto maxkamada xeerka kartida ee Gobalka (oo ah maxkamad Gobal oo awood u leh inay kiis noocaan ah dhagaysato) ama maxkamad degmo oo ku taalla Maraykanka ama Wakaalada Wax Barashada ee Gobalka, haddii gobalkaagu leeyahay farsamo kale ama habraacyo u fasaxaaya dhinacyada inay galaan heshiisyo xalin khilaaf oo sharciyan daladu dhaqan galin karto.

Mudada dib u eegista heshiiska

Haddii adigga iyo degmada dugsigu gashaan heshiis ka dhashay kulanka xalinta khilaafka, labada dhinac midkood (adigga ama degmada dugsiga) ayaa burin kara heshiiska 3 maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood laga bilaabo waqtiga aad adigga iyo degmada dugsigubasaxiixdeen heshiiska.

DHAGAYSIYADA DACWADA CABASHADA AH

DHAGAYSIGA DACWADA EE CADAALADA AH

34 CFR §300.511 & K.A.R. 91-40-29(b)

Guud ahaan

Mar kasta oo dacwad cabasho ah la gudbiyo, adigga ama degmada dugsiga ee doorka ku leh khilaafka waa inaad fursad u heshaan dhagaysiga dacwada oo cadaalad ah, sida ku cad qaybaha ***Dacwada Cabashada ah*** iyo ***Hanaanka Xalinta khilaafka.***

Sarkaalka dhagaysiga cadaalada ah

Ugu yaraan, sarkaalka dhagaysigu:

1. Waa inuusan ahayn shaqaale u shaqeeya Wakaalada Waxbarashada ee Gobalka ama degmada dugsiga e qaybta ka ah waxbarashada ama daryeelka cunugaaga. Hase yeeshee, qofku noqon maayo shaqaale u shaqeeya wakaalada kaliya sabab la xariirta inuu mushaar ka qaato wakaalada si uu u noqdo sarkaalka dhagaysiga dacwada.
2. Waa inuusan lahayn masaalix shaqsi ah ama mid shaqo oo ka hor imaanaysa ujeedada sarkaalka dhagaysiga intuu wado dhagaysiga dacwada;
3. Waa inuu yaqaanaa uuna fahmaa qaybaha sharciga IDEA, sharciyada Federaalka iyo kuwa Gobalka ee la xariira IDEA, iyo fasiraadaha sharciga ee IDEA ee ay sameeyaan maxkamada heer Federaal iyo heer Gobal; **iyo**
4. Waa inuu aqoon iyo awoodba u leeyahay fulinta dhagaysiga dacwada, iyo inuu gaaro uuna qoro go'aannada, si waafaqsan sharciyada ku haboon, ee xeerka caadiga ah.
5. *Si uu marka koobaad ugu qalmo sarkaalka dhagaysiga dacwada ama sarkaalka dib u eegista kiiska ee gobalka, qofku waa inuu ahaado mid ruqsad qareenimo ka haysta gobalka kasoo qofku uga diiwaan gashan yahay inuu yahay mid ruqsad gaar ah u haysta ka shaqaynta sharciga. K.A.R. 91-40-29(b)

Degmo kasta oo dugsi waa inay aysataa liiska shaqsiyaadka u shaqeeya saraakiisha dhagaysiga ahaan kaasoo ay kujiraan bayaanka khibradaha sarkaal kasta oo dhagaysi.

Mawduuca dhagaysiga dacwada

Dhinaca (adigga ama degmada dugsiga) soo codsada dhagaysiga dacwada masoo gudbin karo arimo la xariira dhagaysiga dacwada kuwaasoo aan lagu sheegin dacwadii cabashada ahayd, ilaa in dhinaca kale aqbalo maahee.

Waqtiga u dagsan codsiga dhagaysiga

Adigga ama degmada dugsigu waa inaad codsataa dhagaysi cadaalad ah oo la xariira dacwada cabashada ah laba sano gudahood lagasoo bilaabo markii adigga ama degmada dugsigu aad ogayd ama ay ahayd inaad ogaato arinta lagu sheegaayo cabashada.

Arimaha lagasoo reebaayo waqtga cayiman

Waqtiga cayiman ee kore kuma quseeyo haddii aadan awoodin inaad gudbiso dacad cabasho ah sabab la xariirta:

1. In degmada dugsigu ay si gaar ah uga been sheegtay inay xalisay dhibaatada ama arinta aad kusoo gudbinayso cabashadaada; **ama**
2. In degada dugsu aysan kusiin xog ay ahayd inay kusiiso sida ku cad Qaybta B ee sharciga IDEA.

XAQUUQDA DHAGAYSIGA

34 CFR §300.512

Macluumaad Guud

Waxaad xaq uleedahay inaad naftaada matasho marka la joogo dhagaysiga dacwada (ayna ku jiraan dhagaysi la xariira habraacyada edbinta) ama racfaan aad ka qaadato dhagaysiga si aad u hesho cadayn dheeraad ah, sida lagu qeexay ciwaan doceedka, ***Racfaanka ka dhanka ah go'aanada; dib u eegista cadaalada ah.*** Waxaa intaas dheer, dhinac kasta oo dhagaysiga qayb ka ah wuxuu xaq u leeyahay:

1. Inuu la socdo ama talo siiyo qareen iyo/ama shaqsiyaad tababar gaar ah ama aqoon gaar ah uleh dhibaatooyinka carruurta naafada ah;
2. Inuu goobta dhagaysiga dacwada wakiil uga noqdo qof qareen ah;
3. Inuu keeno cadayn uuna la doodo, baaritaan isdhaaf ah sameeyo, uuna dalbado in marqaati imaado dacwada;
4. Inuu mamnuuco keenista cadayn kasta oo la keeno goobta dhagaysiga dacwada taasoo aan horay loogu shaacin dhinaca kale ugu yaraan shan maalmood oo kuwa shaqada ah ka hor intaan dhagaysiga la qaban;
5. Inuu helo diiwaanka qoran, ama, markaad doorato, elektaroonig ah, ee xogta dhagaysiga oo eray-eray ah; **iyo**
6. Inuu helo diiwaanada qoran, ama, markaad doorato, elektaroonig ah ee natiijooyinka xogta iyo go'aanada.

ogta shaacinta ee dheeraadka ah

Ugu yaraan ka hor shan maalmood oo kuwa shaqada ah xiliga dhagaysiga dacwada, adigga iyo degmada dugsigu waa inaad isa siisaan dhamaan qiimaynada la sameeyay maalintaas iyo talooyinka la xariira qiimaynadaas oo aad adigga ama degmada dugsigu doonayso inay adeegsato marka dhagaysiga la gaaro.

Sarkaalka dhagaysiga ama sarkaalka dib u eegist ayaa u diidi kara dhinac kasta oo ku fashilma raacista sharcigaan inuu keeno qiimayn ama talo la xariirta kiiska goobta dacwada asagoon fasax ka helin dhinaca kale.

Xaquuqaha waalidka ee goobta dhagaysiga

Waxaa qasab ah in lagu siiyo xaqa aad u leedahay:

1. In cunugaagu soo xaadiro goobta dhagaysiga;
2. In loo furo dhagaysiga dacwada dadwaynaha; **iyo**
3. In lagu siiyo diiwaanka dhagasiga, natiijooyinka xaqiiqada, iyo go'aanada go'aanada oo lagugu siiyo si lacag la'aan ah.

GO'AANADA DHAGAYSIGA

34 CFR §300.513

Go'aanka sarkaalka dhagaysiga

Go'aanka sarkaalka dhagaysiga ee la xariira in cunugaagu helo waxbarashada dawlada ee ku haboon oo bilaash ah (FAPE) waa in lagu saleeyaa cadayn iyo doodo si toos ah ula xariira FAPE.

Arimaha soo jeedinaaya edayn la xariira habraaca (sida "Kooxda IEP da oo aan dhamaystirnayn"), sarkaalka dhagaysiga ayaa ogaan kara inaan cunugaagu helin FAPE kaliya haddii xadgudubka kadhanka ah habraaca:

1. Ay caqabad ku noqdeen xaqa cunugaagu u leeyahay waxbarashada dawlada oo bilaash ah kuna haboon (FAPE);

2. Uu si wayn caqabad ugu noqday fursada aad u heli karto ka qaybgalka hanaanka go'aan gaarista ee la xariira bixinta waxbarashada dawlada oo bilaash ah oo ku haboon (FAPE) oo la siiyo cunugaaga; **ama**
3. Uu u horseeday cunugaaga inuusan helin guno dhanka waxbarashada ah.

Majiro wax kamid ah adeegyada lagu sharxay kor oo loo adeegsan karo in loga hor istaago sarkaalka dhagaysiga inuu amro degmada dugsiga inay raacdo shuruudaha ku cad qaybta tusmooyinka habraaca ee xeerarka federaalka ee ku jira Qaybta B ee sharciga IDEA (34 CFR §§300.500 ilaa 300.536).

Ma jiraan wax kamid ah adeegyada ku jira ciwaannada: ***Gudbinta Dacwad Cabasho ah; Dacwada Cabashada ah; Foomamka Naqshada; Hanaanka Xalinta; Dhagaysiga Dacwada ee Cadaalada ah; Xaquuqda Dhagaysiga; iyo go'aanada Dhagaysiga*** (34 CFR §§300.507 ilaa 300.513), oo saamayn kara xaqa aad u leedahay inaad soo gudbiso racfaan ka dhan ah go'aanka dhagaysiga dacwada ood u gudbiso Wakaalada Wax barashada ee Gobalka.

Codsi gaar ah oo la xariira dhagaysiga dacwada

Ma jirana wax ku jira qaybta tusmooyinka habraaca ee xeerarka federaalka e ku jira Farqada B ee Sharciga IDEA (34 CFR §§300.500 ilaa 300.536) oo loo adeegsan karo in lagaaga hor istaago inaad gudbiso dacwad cabasho oo gaar ah oo la xariirta arin ka baxsan dacwada cabashada ah ee aad horay u gudbisay.

Natiijooyinka iyo go'aanka la siiyo golaha talo bixinta iyo dad waynaha

Wakaalada Wax barashada Gobalka ama degmada dugsiga, (hadba kii masuulka ka ahaa dhagaysigaaga(kadib markay ka tirto xog kasta oo cadaynaysa aqonsigaaga, waa inay:

1. Siisaa natiijooyinka iyo go'aanada la xariira dhagaysiga dacwada ama racfaanka gollaha gaarka ah ee talo bixinta Gobalka; **iyo**
2. Inay u furtaa natiijooyinkaas iyo go;aanadaas dad waynaha.

RACFAANNADA

KAMA DANBAYSNIMADA GO'AANKA; RACFAANKA; DIB U EEGIS CADAALAD AH

34 CFR §300.514 & K.A.R. 91-40-51(f)

Kama danbaysnimada go'aanka Dhagaysiga

Go'aanka laga gaaro dacwada dhagaysiga ah (oo ay ku jirto dhagaysiga dacwad ala xariirta anshaxa) waa mid kama danbays ah, marka laga reebo in dhinac kamid ah kuwa ku jira dacwada dhagaysiga (adigga ama degmada dugsiga) uu racfaan ka qaadan karo go'aanka una gudbin karo codsiga racfaanka Wakaalada Wax barashada Gobalka.

*Habraacyada cabashada ee gobalka waxaa ku jira xaqa waalidka ama degmada dugsigu u leedahay inay racfaan ka qaadato natiijooyinka ama gabagabada warbixinta cabashada. K.A.R. 91-40-51(f)

Racfaanka ka dhanka ah go'aanada; dib u eegis cadaalad ah

hAddii dhinac (adigga ama degmada dugsiga) ay waxyeeleeyaan (dhibaato u gaystaan) natiijooyinka kasoo baxa go'aanka dhagaysiga, racfaan ayaa loo gudbin karaa Wakaalada Wax Barashada Gobalka.

Hadduu jiro racfaan, Wakaalada Wax barashada Gobalku waxaa qasab ah inay ku samayso dib u eegis cadaalad ah natiijooyinka iyo go'aanka racfaanka. Sarkaalka fulinaaya dib u eegistu waa inuu:

1. Qiimeeyaa dhammaan diiwaanada dhagaysiga;
2. Xaqiijiyaa in habraacyada dhagaysigu ahaayeen kuwo waafaqsan shuruudaha hanaanka dhagaysiga;
3. Uu raadsho cadayn dheeri ah hadduu u baahdo. Haddii dhagaysi la qabto si loo helo cadayn dheeraad ah, xaquuqda dhagaysiga ee ku cad ciwaanka ***Xaquuqda Dhagaysiga*** ayaa shaqaynaaya;
4. In la siiyo dhinacyaa fursad ay kusoo gudbiyaan dood afka ah ama qoraal ah, ama labadaba, sida uu aqbalo sarkaalka dib u eegista samaynaaya;
5. Inuu gaaro go'aan madax banaan markuu soo dhameeyo dib u eegista; **iyo**
6. Inuu ku siiyo adigga iyo degmada dugsiga koobiga natiijooyinka xaqiiqada iyo go'aanada oo qoraal ah, ama, markaad doorato, ayagoo elektarooniga ah.

Natiijooyinka iyo go'aanka la siiyo golaha talo bixinta iyo dad waynaha

Wakaalada Wax barashada ee Gobalku, kadib markay tirto xog kasta oo muujinaysa aqoonsigaaga, waa inay:

1. Siisaa natiijooyinka iyo go'aanada la xariira racfaanka gollaha gaarka ah ee talo bixinta Gobalka; **iyo**
2. Inay u furtaa natiijooyinkaas iyo go;aanadaas dad waynaha.

Kama danbaysnimada go'aanka dib u eegista

Go'aanka uu gaaro sarkaalka dib u eegistu waa mid kama danbays ah ilaa in adigga ama degmada dugsigu keento maahee dacwad madani ah, sida ku cad ciwaanka ***Dacwadaha Madaniga ah, ayna Ku jiraan Waqtiga Mudada lagu Gudbinaayo Dacwadahaas.***

JADWALADA IYO KU QANCIDA DHAGAYSIYADA IYO DIB U EEGISYADA

34 CFR §300.515

Degmada dugsigu waa inay xaqiijisaa in ugu danbayn muddo 45 maalmood ah kadib markay dhamaato mudada kullanada Xalinta cabashada ee 30 maalmood ah **ama,**. sida ku cad ciwaan doceedka

Kordhinta mudada Xalinta cabashada ee 30 maalmood ah, ugu danbayn kadib 45 maalmood kadib markay dhamaato mudada la kordhiyay:

1. In go'aan kama danbays ah laga gaaro dhagaysiga; **iyo**
2. In koobiga go'aanka bostada ay ugu dirto adigga iyo degmada dugsiga.

Wakaalada Waxbarashada ee Gobalku waa inay xaqiijisaa in ugu danbayn 30 maalmood kadib markay hesho codsiga dib u eegista:

1. In go'aan kama danbays ah laga gaaro dib u eegsita; **iyo**
2. In koobiga go'aanka bostada ay ugu dirto adigga iyo degmada dugsiga.

Sarkaalka dhagaysiga ama dib u eegista ayaa bixin kara kordhino gaar ah oo lagu daro waqtiyada kor ku cad (45 maalmood oo lagu soo saaraayo go'aanka dhagaysiga iyo 30 maalmood oo lagusoo saaraayo go'aanka dib u eegista) haddii adigga ama degmada dugsigu soo gudbiso codsi la xariira kordhinta muddo cayiman oo lagu sameeyo jadwalka.

Dhagaysi kasta ama dib u eegis la xariirta doodaha afka ah waa in lagu qabtaa waqti iyo goob aad si macquul ah ugu qanacdaan adigga iyo cunugaagu.

DACWADAHA MADANIGA AH, AYNA KU JIRAAN MUDADA WAQTIGA LAGU GUDBINAAYO DACWADAHAAS

34 CFR §300.516

Macluumaad Guud

Dhinac kasta (adigga ama degmada dugsiga) kaasoo aan aqbalin natiijooyinka iyo go'aanka kasoo baxa dib u eegista heer gobal ayaa xaq u leh inuu dacwad madani ah oo arintaan dhagaysiga dacwada cabashada la xariirta soo gudbiyo (ayna ku jiraan dhagaysiga la xariira anshaxa). Waa in dacwada la keenaa maxkamad Gobal oo sharciyan arintaan qusaysa (maxkamad Gobal oo awood u leh inay dhagaysato kiis noocaan ah) ama maxkamad degmo oo Maraykanka ku taala ayadoon laga eegayn cadadka khilaafka.

Xididaada Waqtiga

*Dhinaca (adigga ama degmada dugsiga) ee soo gudbinaya dacwadu waa inuu haystaa 30 maalmood laga bilaabo marka uu soo baxo go'aanka sarkaalka dib u eegista ee Gobalku si uu u gudbiyo dacwad madani ah (K.S.A. 72-974(d)).

HABRAACYO DHEERAAD AH

Dacwad kasta oo madani ah, maxkamadu:

1. waxay helaysaa diiwanada dacwooyinka maamulka;
2. Waxay dhagaysanaysaa cadayn dheeri ah markaad codsato ama degmada dugsigu codsato; **iyo**
3. Waxay ku dhisaysaa go'aanadeeda awooda xaqiiqo ee cadaynta waxayna damaanad qaadaysaa xaqiiqada ah in go'aanka maxkamadu yahay mid sax ah.

Markay jiraan arimo ku haboon, xal dhanka garsoorka ah waxaa ku jiri kara in laguu soo celiyo lacagta kaaga baxday dugsiga gaarka loo leeyahay iyo in lagu siiyo adeegyo wax barasho oo magdhaw ah.

Awooda sharci ee maxkamadaha degmada

Maxkamada degmada ee Maraykanku waxay awood u leeyihiin inay xukun kasoo saaraan dacwadaha ku jira Farqada B ee sharciga IDEA ayadoon laga eegayn tirada khilaafka.

Xeerka dhismaha

Majiraan wax ku jira Qaybta B ee sharciga IDEA oo xanibaaya ama xadidaaya xaquuqda, habraacyada, iyo talooyinka la heli karo ee ku jira Dastuurka Maraykanka, Sharciga Dadka Ameerikaanka ah ee Naafada ah oo soo baxay 1990, Title V ee Sharciga Dhaqan Celinta oo soo baxay 1973 (Qaybta 504), ama sharciyada kale ee Federaalka oo difaacaaya xaquuqda carruurta naafada ah, marka laga reebo in

ka hor gudbinta dacwad madani ah oo ku qeexan sharciyadaan laguna doonaayo xukun sidoo kale lagu fulin karo Farqada B ee sharciga IDEA, habraacyada dacwada ee kor lagu sheegay waa in laga daalo si lamid ah siday qasab u ahaan lahayd haddii dhinac gudbiyo dacwada si waafaqsan Farqada B ee sharciga IDEA. Tan ayaa ka dhigan inaad heli karto adeegyada la heli karo ee ku jira sharciyada kale ee ay is waafaqayaan kuwa ku jira IDEA, laakiin si guud, si laguu siiyo xukun waafaqsan sharciyadaas kale, waa inaad marka koobaad adeegsataa awoodaha adeegyada maamul ee ku jira sharciga IDEA (tusaale, dacwada cabashada; hanaanka Xalinta, uuna ku jiro kulanka xal raadinta; iyo habraacyada dhagaysiga Dacwada ee Cadaalada ah) ka hor intaadan si toos ah u aadin maxkamad.

MEELAYNTA CUNUGA INTAY SOCDAAN DACWADA CABASHADA IYO DHAGAYSIGU

34 CFR §300.518

Marka laga reebo sida hoos lagu sheegay ee ku cad ciwaanka **NIDAAMYADA LA MARO MARKA LA EDBINAAYO ILMAHA NAAFADA AH**, marka dacwada cabashada loo gudbiyo dhinaca kale, inta lagu jiro mudada hanaanka xal raadinta cabashada, inta la sugaayo go'aanka dhagaysi kasta oo cadaalada ah ama dacwad maxkamadeed, ilaa in adigga iyo gobalka ama degmada dgsigu si kale ku heshiisaan mooyee, cunugaagu waa inuu kusii jiraa goobtiisa waxbarasho ee hadda.

Haddii dacwada cabashadu la xariirta codsi quseeya diiwaangalinta hore ee dugsi dawladeed, cunugaaga, markaad ogolaansho bixiso, waa in la geeyaa barnaamij toos ah oo dugsi dawladeed ah ilaa laga dhamaystiraayo dhammaan dacwadaha noocaas ah.

Haddii dacwada cabashada ah ay la xariirto codsiga adeegyada hore ee aafaqsan Farqada B ee sharciga IDEA oo loo rabo ilmo kasoo adeegyada Qaybta C ee IDEA una so wareegaaya Qaybta B ee IDEA kaasoo aan hadda xaq u lahayn adeegyada Qaybta C sabab la xariirta in ilmuhu sadex sano jirsaday, degmada dugsiga qasab kuma ahan inay siiso adeegyada Qaybta C cunugaas markii hore helaayay. Haddii cunugu noqdo mid xaq u leh adeegyada Qaybta B ee IDEA aadna ogolaato in cunugaagu helo adeegyada waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xariira markiisii koobaad, markaas, natiijada dacwadaha aan soo bixin ali, degmada dugsigu waa inay siisaa adeegyada waxbarashada gaarka ah iyo kuwa la xariira ee aan muranku ka taagnayn (adeegyada aad adigga iyo degmada dugsigu isku waafaqsan tihiin).

Haddii sarkaalka dib u eegista ee gobalka ee dacwada racfaanku uu kugu waafaqo in badalista goobta cunugu ay haboon tahay, meelayntaas waa in loo sameeyaa in goobta waxbarashada ee cunugaagu ay sideeda ahaanayso inta go'aanka dhagaysiga Dacwada ee Cadaalada ah ama dacwada maxkamada lagasoo gaba gabaynaayo.

QARASHAADKA QAREENKA

34 CFR §300.517

Macluumaad Guud

Dacwad ama codsi kasta oo lagusoo gudbiyo si waafaqsan Qaybta B ee sharciga IDEA, maxkamadu, ayadoo raacaysa garashadeeda, waxay kusiin kartaa qarashaadka qareenka oo macquul ah oo qayb ka ah qarashaadka lagugu yeesho, haddii aad xukunka ku adkaato (guul).

Dacwad ama codsi kasta oo lagusoo gudbiyo si waafaqsan Qaybta B ee sharciga IDEA, maxkamadu, ayadoo raacaysa garashadeeda, waxay siin kartaa qarashaadka qareenka oo macquul ah oo qayb ka ah qarashaadka lagu yeesho Wakaalada Wax barashada Gobalka ama degmada dugsiga ee guulaysatay, taasoo uu bixinaayo qareenkaagu, haddii qareenku: a() uu cabashada ama kiiska maxkamada gudbiyay kaasoo maxkamadu ogaatay inuu yahay mid been ah, bilaa sabab ah, ama aan aasaas lahayn; **ama** (b) uu sii wado dacwada kadib markii dacwadu noqotay mid been ah, bilaa sabab ah, ama aan aasaas lahayn; **ama**

Dacwad kasta ama xukun lagusoo gudbiyo Qaybta B ee sharciga IDEA, maxkamadu, ayadoo raacaysa garaadkeeda, waxay siin kartaa qarashaadka qareenka oo macquul ah Wakaalada Waxbarashada ee Gobalka ama degmada dugsiga ee guulaysata, taasoo aad bixinayso ama uu bixinaayo qareenkaagu, haddii codsigaaga dhagaysiga dacwada ama kiiskaaga danbe ee maxkamada lagusoo gudbiyay qaab khaldan, sida dhibaatayn, abuurista dib u dhac maalaayacni ah, ama in si gardaro ah loo kordhiyo qarashka dacwada ama kiiska (dhagaysiga).

Abaal marinta Qarashka

Maxkamadu waxay ku bixisaa abaal marinta qarashka qareenka sidaan soo socota:

1. Qarashka waa in lagu saleeyaa qiimayaasha guusha kiiska ee deegaanka dacwada ama kiisku ka dhashay oo waafaqsan nooca iyo tayada adeegyada la baxshay. Ma jiraan boonaas ama laba jibaare loo adeegsan karo xisaabinta qarashka lagu bixinaayo abaal marinta.
2. Qarashka qareenka lama bixin karo qarashaadka la xariirana lama soo magi karo dacwad kasta ama kiis waafaqsan Qaybta B ee sharciga IDEA sabab la xariirta adeegyo la baxshay kadib markii xalka kiiska oo qoran laguusoo diray haddii:
    a. Dalabka laguusoo gudbiyay waqtiga lagu qeexay Xeerka 68 ee Xeerarka Habraaca Madaniga ah ee Federaalka ama, markay qusayso dhagaysiga dacwada ama dib u eegista dacwada oo heer gobal ah, waqti kasta oo ka badan 10 maalmood ka hor intaan dacwadu bilaabmin;
    b. Aan dalabka la aqbalin 10 maalmood gudahood; **iyo**
    c. Sarkaalka maxakamda dhagaysiga maamulku uu ogaato in xukunka aad kama danbaystii heshay uusan kaaga faa'iido badnayn dalabkii xalinta arinta ee lagu siiyay.

    Ayadoo ay jiraan xadidaadahaan, waxaa lagu siin karaa qarashka kaaga baxa qareenka iyo qarashaadka la xariira haddii aad kiiska ku rayso aadna si macquul ah u sababayso diidmada dalabka xalinta khilaafka.
3. Qarashka laguma siin karo sabab la xariirta kulan kasta ood la yeelatay Kooxda barnaamijka Waxbarashada gaarka ah (IEP) ilaa in kulanka lagu qabtay maahee sabab la xariirta dacwada maamulka ama dacwada maxkamada.
4. Qarashaadka ayaan sidoo kale lagu siin karin sabab la xariirtta dhexdhexaadin sida ku cad ciwaanka Dhexdhexaadin.

Kulanka xal raadinta, sida ku cad ciwaanka **Hanaanka Xalinta**, looma aqoonsana inuu yahay kulan ka dhashay dhagaysiga maamul ama dacwad maxkamadeed, sidoo kale looma arko dhagaysi maamul ama dacwad maxkamadeed sababo la xariira bixinta qarashaadka dareennada.

Maxkamadu waxay yaraynaysaa, sida ugu haboon, cadadka qarashaadka Qareenka ee lagu bixinaayo si waafaqsan Qaybta B ee sharciga IDEA, haddii maxkamadu ogaatay in:

1. Adigga, ama qareenkaaga, intii lagu jiray dacwada ama kiiska, aad si aan macquul ahayn dib ugu dhigteen xalka kama danbaysta ah ee khilaafka;
2. Cadadka qarashaadka Qareenka ee haddii kale lagu amray in la baxsho ay si aan maquul ahayn uga badan tahay qiimaha saacad laha ah ee dhinaca guulaysta ee ka jira deegaanka oo lagu baxsho adeegyada kuwaas la midka ah ayna baxshaan qareenno leh xirfad, sharaf, iyo khibrad kuwaas lamid ah;
3. Waqtiga la baxshay iyo adeegyada sharci ee la sameeyay ay aad u badnaayeen marka laga eego nooca dawaca ama kiiska; **ama**
4. Qareenka wakiilka kaa ah uusan siin degmada dugsiga xogta saxda ah ee ku qoran ogaysiiska codsiga dacwada sida ku cad ciwaanka ***Dacwada Cabashada ah.***

Hase yeeshee, maxkamadu ma yarayn karto qarashaadka haddii maxkamadu ogaato in Gobalka ama degmada dugsigu si aan macquul ahayn dib ugu dhigeen xalka kama danbaysta ah dacwada ama dhagaysiga ama ay jireen xad gudubyo ka dhan ah adeegyada tusmooyinka habraaca ee Qaybta B ee sharciga IDEA.

NIDAAMYADA MARKA LA EDBINAAYO CARRUURTA NAAFADA AH

AWOODA SHAQAALLAHA DUGSIGA

34 CFR §300.530

Go'aanka kiisba-kiiska ah

Shaqaalaha dugsiga ayaa ka fakari kara xaalado kasta oo qaas ah si kiisba-kiis ah markay go'aaminayaan in isbadal lagu sameeyo meelaynta, oo lagu sameeyo si waafaqsan shruudaha la xariira anshaxa, ay ku haboon yihiin ilmo naafo ah oo ku xadgudba xeerka dugsiga ee anshaxa ardayda.

Macluumaad Guud

Si lamid ah markay ay sidoo kale qaadayaan talaabo noocaas ah oo ka dhan ah carruurta aan naafada ahyn, shaqaalaha dugsigu waxay, waxaan ka badnayn **10 maalmood** oo xariir ah, kasaari karaan cunug naafo ah oo ku xad gudba xeerka anshaxa ee ardayda dugsiga meelayntiisa hadda ayagoo gaynaaya goob waxbarasho oo ku haboon oo si ku meel gaar ah loogu hayo, goob kale, ama in dugsiga laga cayrsho. Shaqalaaha dugsiga ayaa sidoo kale ganaaxyo kale oo dugsi ka sarid ah kusoo nrogi kara cuuga muddo aan ka badnayn **10 maalmood** oo xariir ah isla sanad dugsiyeedkaas sababo la xariira dhacdooyin kale oo anshax daro, ilaa iyo inta saarisyadaas aysan keenayn in la badalo goobtiisa waxbarasho (ka fiiri ciwaanka ***Badalka Goobta Sabab la xarirta Dugsi Kasaarid dhanka Anshaxa ah*** si aad u hesho qeexitaanka).

Marka cunuga nafada ah laga saaro guubtiisa hadda muddo wadarta guud isku ah 10 maalmood isla sanad dugsiyeedka, waxaa qasab ku ah degmada dugsiga, inta lagu jiro maalmaha is xigxiga ee dugsiga laga saaray sanad dugsiyeedkaas, inay siiso adeegyada ilaa heerka qasabka ah ee hoose ee ku jira ciwaanka ***Adeegyada***.

Awood Dheeraad ah

Haddii hab dhaqanka xad gudubka ku ahaa xeerka anshaxa ardayda uusan sabab u ahayn naafanimada ardayga (fiiri ciwaan doceedka ***Go'aaminta sababta hab dhaqanka***) talaabada badalka goobta ee edbinta ahna ay ka badanayso **10 maalmood** oo xariir ah, shaqaalaha dugsigu waxay ka qaadi karaan habraacyada edbinta cunugaas naafada ah si lamid ah iyo waqti la mid ah sida loo edbinaayo ardayda aan naafad aahayn, marka laga reebo inay dugsiga qasab ku tahay inuu siiyo adeegyada cunuga sida ku cad qaybta hoose ee ***Adeegyada***. Kooxda IEP da cunuga ayaa go'aaminaysa goob wax barasho oo badal ah oo lagu siiyo adeegyada noocaas ah.

Adeegyada

Degmada dugsiga qasab kuma ahan inay siiso adeegyada cunuga naafada ah ama cunuga aan naafada ahayn oo laga saaray dugsigiisa hadda muddo dhan **10 maalmood ama ka yar** isla sanad dugsiyeedka.

Ilmaha nafada ah ee laga saaray goobtiisa hadda wax **ka badan 10 maalmood** aysana habdhaqanku ahayn sabab la xariirta naafadiisa (ka fiiri ciwaan doceedkan, ***Go'aaminta sababta hab dhaqanka***) ama lagu saaray sababo gaar ah (fiiri ciiwaan doceedka, ***Xaaladaha Gaarka ah)*** waxaa qasab ah:

1. In loosii wado helitaanka adeegyada wax barashada (inuu helo waxbarashada la heli karo ee ku haboon ee dawlada oo bilaash ah), si loogu ahlo ilmaha inuu sii wato ka qaybgalka manahajka waxbarashada guud, inkastoo uu ku jiro goob kale (taasoo noqon karta goob waxbarasho oo ku meel gaar ah), iyo inuu hormar ka sameeyo buuxinta yoolalka ku cad IEP da cunuga; ***iyo***
2. Inuu helo, sida ku haboon, qiimaynta shaqada habdhaqanka, adeegyada caawimaada habdhaqanka iyo isbadalo, kuwaasoo loogu sameeyay in wax looga qabto xad gudubka ka dhanka ah habdhaqanka si loo xaqiijiyo xadgudubka hab dhaqanka si aysan mar danbe u dhicin.

Kadib marka ilmaha naafada ah laga saaro goobtiisa hadda muddo dhan **10 maalmood oo kuwa dugsiga ah** isla sanad dugsiyeedkaas, iyo **haddii** saarista hadda ay tahay **10 maalmood oo kuwa dugsiga ah** oo isku xiga ama ka yar **iyo** haddii saaristu aysan ahayn isbadal lagu samaynaayo meelaynta (arag qeexitaanka hoose), **kadib** saraakiisha dugsiga, oo uu ku jiro maamulaha caadiga ah ee

waxbadashada; agaasimaha waxbarashada gaarka ah ama wakiilka ama wakiilada agaasimaha; iyo macallinka waxbarashada gaarka ah ee cunuga (K.A.R. 91-40-33(b)), ayaa go'aaminaaya heerka adeegyada loo baahan yahay si loogu sahlo ilmaha inuu sii wato ka qaybgalka manhajka waxbarashada guud, inkasta oo uu ku jiro goob kale, uuna hormar kasameeyo buuxinta yoolalkiisa ku dagsan IEP da cunuga.

Haddii goob ka saaristu tahay badal lagu sameeyo xaruntiisa (fiiri ciwaanka, ***Badalka Goobta sabab La xariirta Goob K asaarisyada dhanka Anshaxa***), Kooxda IEP da cunuga ayaa go'aaminaaya adeegyada ku haboon si loogu sahlo cunuga sii wadashada ka qaybgalka mahajka waxbarashada guud, intas oo uu ku jiro goob kale (taasoo noqon karta goob waxbarasho oo ku meel gaar ah), uuna hormar uga sameeyo buuxinta yoolalaka ku cad IEP ga cunuga.

Go'aaminta sababta anshax xumada

Inta lagu jiro **10 maalmood oo kuwa dugsiga ah** gudahood kadib marka lagaaro go'aan la xariira badalka goobta ee cunuga naafada ah sabab la xariirta inuu jabiyay xeerka anshaxa ardayda (marka laga reebo saarista ah **10 maalmood oo kuwa dugsiga ah** oo xariira ama ka yar aana ahayn badalka goobtiisa waxbarasho), degmada dugsiga, adigga, iyo xubnaha kale ee ay hawshu qusayso ee kamid ah Kooxda IEP (siday go'aanshaan adigga iyo degmada dugsiga) waxaa qasab ku ah inay dib u eegis ku sameeyaan xogta arintaan qusaysa ee kujirta faylka ardayda, ayna ku jiraan IEP ga cunuga, wax kasta oo macallinku arkay, iyo xog kasta oo arintaas la xariirta oo aad adigu soo gudbisay si ay u go'aanshaan:

1. Haddii anshaxa ganaaxa keenay uu ka dhashay, ama uu si toos ah ama is xigxigta ula xariiro, naafada cunuga; **ama**
2. Haddii anshaxa su'aashu ka taagan tahay uu yahay natiijada tooska ah ee ku fashilanka degmada dugsigu ku fashilantay fulinta IEP ga ardayga.

Haddii degmada dugsiga, adigga, iyo xubnaha kale ee ay arintaani qusayso ee Kooxda IEP da ardayga aad go'aamisaan in mid kamid ah shuruudahaas la buuxshay, talaabada anshaxa ah waa in lagu go'aanshaa inay tahay mid ka dhalatay naafanimada cunuga.

Haddii degmada dugsiga, adigga, iyo xubnaha kale ee arintu qusayso ee kooxda IEP du aad go'aamisaan in falka anshaxa ee su'aashu ka taagan tahay u toos uga dhashay ku fashilanka degmada ee ah inay dhaqan galiso IEP da cunuga, waa in degmada dugsigu qaado talaabo degdeg ah si ay u xaliso ciladahaas.

Go'aaminta in habdhaqanku ahaa mid ka dhashay naafanimada cunuga

Haddii degmada dugsiga, adigga, iyo xubnaha kale ee arintaani qusayso ee kooxda IEP da cunuga aad go'aamisaan in falka anshaxu yahay sabab la xariirta naafanimada cunuga, Kooxda IEP waxaa qasab ku ah midkood:

1. Inay fuliyaan qiimaynta shaqada habdhaqanka, ilaa in degmada dugsigu ay samaysay maahee qiimaynta hab dhaqanka hadda ka hor intaan hab dhaqanka keenay isbadalka goobta uu dhacay, iyo inay dhaqan galiyaan qorshaha caawimaad ahab dhaqanka ee cunuga; **ama**
2. Haddii qorshaha caawimaada hab dhaqanka horay loo abuuray, inay dib u eegis ku sameeyaan qorshaha caawimaada hab dhaqanka, ayna wax ka badalaan, hadday muhiim tahay, si loo xaliyo hab dhaqanka.

Marka laga reebo sida ku cad qaybta hoose ee ciwaan doceedka ***Xaaladaha Gaarka ah***, waxaa qasab ku ah degmada dugsiga inay cunuga ku celiso booskiisa ee markii hora ay ka saartay cunugaaga, ilaa in adigga iyo degmadu ku heshiisaan maahee in badalka goobtu qayb ka noqdo isbadalka lagu samaynaayo qorshaha caawimaada hab dhaqanka.

Xaaladaha Gaarka ah

Haddii hab dhaqanku ahaa sabab la xariirta naafanimada cunuga iyo haddii kalaba, shaqaalaha dugsigu waxay kasaari karaa ardayga dugsiga ayagoo gaynaaya goob waxbarasho oo ku meel gaar ah (oo ay go'aaminayaan kooxda IEP da cunuga) waxaan ka badnayn 45 maalmood, haddii cunugaagu:

1. Uu sito hub (fiiri qeexitaanka hoose) uuna la yimaado dugsiga ama uu hub ku haysto dugsiga, gudaha dhismaha dugsiga, ama goob lagu hayo shaqada dugsiga oo ay leedahay Wakaalada Wax Barashada ee Gobalku ama degmada dugsiga;
2. Uu si kas ah u haysto ama u adeegsato daroogada sharci darada ah (arag qeexitaanka hoose), ama uu iibsho ama dhexdhexaadsho iibka maandooriyaal aan la ogolayn, (arag qeexitaanka hoose), intuu joogo dugsiga, ku jiro dhismayaasha dugsiga, ama joogo shaqada dugsiga oo ay maamshu Wakaalada Wax barashada ee Gobalka ama degmada dugsiga; **ama**
3. Uu u gaysto dhaawac daran oo jireed (fiiri qeexitaanka hoose) qof kale asagoo jooga dugsiga, gudaha dhismaha dugsiga, ama goob lagu hayo shaqada dugsiga oo ay leedahay State Educational Agency (Wakaalada Wax Barashada ee Gobalku) ama degmada dugsiga.

Qeexitaannada

Maadoriyaal aan La ogolayn waxaa laga wadaa daroogo ama maandooriye kale oo ku qeexan jadwalada I, II, III, IV, ama V ee ku jira qaybta 202(c) ee Sharciga Controlled Substances Act (Maandooriyaasha Aan La Ogolayn) (21 U.S.C. 812(c)).

Daroogo sharci daro ah waxaa laga wadaa mandooriye la xakameyay; laakiin kuma jiraan maadooriyaasha aan la ogolayn kuwaasoo sharciyan loo haysto ama lagu adeegsato ayadoo uu kormeeraayo dhakhtar daryeelka caafimaadka oo ruqsad u haysta ama sharciyan loo haysto ama loogu adeegsato si waafaqsan awood kale oo ku cad Sharcigaas ama xeerar kale oo ku jira sharciga Federaalka.

Dhaawac daran oo jirka ah wuxuu leeyahay macnaha erayga "dhaawac daran oo jired" oo ku cad farqada (3) ee qodabka (h) ee qaybta 1365 ee sharciga title 18, ee United States Code (Maraykanka).

Hub wuxuu leeyahay macnaha erayga "hub khatar ah" oo ku cad farqada (2) ee qodabka (g) ee qaybta 930 ee sharciga title 18, ee Maraykanka.

Ogsiinta

Isla maalinta ay gaarto go'aanka saarista oo ah badalka goobta waxbarashada ee cunugaaga sabab la xariirta xad gudub uu u gaysatay xeerka anshaxa ardayda, waxaaqasab ku ah degmada dugsiga inay kugu wargaliso go'aankaas, ayna ku siiso ogaysiiska tusmooyinka habraaca.

BADALKA GOOBTA SABAB LA XARIIRTA KA SAARITAANKA DHANKA ANSHAXA

34 CFR §300.536

Ka saarista cunugaaga naafada ah oo laga saaraayo goobta uu hadda wax ka barto waa **badalka goobta** haddii:

1. Goob ka saaristu ay ka badan tahay 10 maalmood oo kuwa dugsiga ah oo xariir ah; **ama**
2. Cunugaagu uu maray taxanayaal dugsi ka saaris ah kuwaasoo joogto noqday sabab la xariirta:
    a. Taxanayaasha dugsi kasaarista oo wadarta guud ka badan 10 maalmood oo kuwa dugsiga ah sanad dugsiyeedkiiba;
    b. Hab dhaqanka cunugaagu uu si joogto ah ula mid yahay hab dhaqanka cunuga ee dhacdooyinkii horay u dhacay ee keenay taxanayaasha dugsi ka sarista ah; iyo
    c. Marka laga fiirsho sababahaas dheeriga ah dheerar ahaan mar kasta oo laga saaro dugsiga, wadarta guud ee waqtiga cunugaagu ka baxsanaa dugsiga, iyo qiyaasta inta jeer ee la saaray marka laysku fiirsho.

In dugsi ka saarista taxanaha ah ay keenayso in la badalo goobta waxbarashada ee cunuga waxaa lagu go'aanshaa qaab kiisba-kiis loo qiimaynaayo oo ay samaynayso degmada dugsiga iyo, haddii aad ka hor timaado, la marsiin karo dib u eegis ayadoo la adeegsanaayo dhagaysi iyo dacwad sharci.

GO'AAMINTA GOOBTA

34 CFR § 300.531

Kooxda Barnaamijka waxbarashada gaarka ah (IEP) ayaa go'aaminaysa goobta waxbarashada badalka ah ee ku meel gaarka ah ee loo adeegsanaayo dugsi kasaarisyada ah **badalka goobta**, iyo dugsi ka saarisyada ku cad ciwaan doceedyada ***Awood Dheeraad ah iyo Xaaladaha Gaarka ah.***

RACFAANKA

34 CFR § 300.532

Macluumaad Guud

Waxaad gudbin kartaa dacwad cabasho ah (fiiri ciwaanka ***Habraacyada Dacwada Cabashada ah***) si aad u codsato dhagaysiga dacwad haddii aad ka hor timaado:

1. Go'aan kasta oo la xariira meelaynta lagu sameeyay xeerarkaan anshaxa; **ama**
2. Go'aaminta sababta anshax xumada ee kor lagu qeexay.

Degmada dugsiga ayaa gudbin karta dacwad cabasho (kor ka fiiri) si ay u codsato dhagaysi haddii ay aaminsan tahay in ilaalinta meelaynta hadda ee cunugaagu ay u badan tahay inay keento dhaawac gaara cunugaaga ama dadka kale.

Awooda sarkalka dhagaysiga dacwada

Sarkaalka dhagaysiga dacwada ee buuxshay shuruudaha ku cad ciwaan doceedka ***Sarkaalka dhageysiga dhexdhexaadka*** waa inuu sameeyaa dhagaysiga dacwada uuna soo saaraa go'aan. Sarkaalka dhagaysiga ayaa:

1. ku celin kara cunugaaga naafada ah goobtii cunugaaga laga soosaaray haddii sarklaalka dhagaysigu go'aansho in dugsi kasaaristu ahayd xad gudub ka dhan ah shuruudaha ku cad ciwaanka ***Awooda Shaqaallaha Dugsiga***, ama in hab dhaqanka cunugaagu ahaa sabab la xariirta naafanimada cunugaaga; **ama**
2. Uu amro badalka goobta cunugaaga naafada ah lana geeyo goob waxbarasho oo badal oo ku meel gaar ah muddo aan ka badnayn 45 maalmoo haddii sarkaalka dhagaysigu go'aansho in haddii cunugaaga lagu sii hayo goobtiisa hadda ay u badan tahay inay keento dhaawac cunugaaga ama dadka kale gaara.

Habraacyadaan dhagaysiga ayaa lagu celin karaa, haddii degmada dugsigu aaminsan tahay in ku celinta cunugaaga lagu cesho goobtiisii hore ay u badan tahay inay sababto dhaawac gaara cunugaaga ama dadka kale.

Haddii adigga ama degmada dugsigu gudbiso dacwad cabasho ah si ay u codsato dhagaysigaas, waa in la sameeyaa dhagaysi buuxinaaya shuruudaha ku cad ciwaannada H**abraacyada Dacwada Cabashada ah, Dhagaysiyada dacwada Cabashada ah, iyo, Racfaanka ka dhanka ah go'aanada; dib u eegis cadaalad ah,** marka laga reebo arimaha soo socda:

1. Wakaalada Waxbarashada ee Gobalka ama degmada dugsigu waa inay diyaarisaa dhagaysiga dacwada oo boobsiis ah, kaasoo ay qasab tahay inuu dhaco **20** maalmood oo kuwa dugsiga ah gudahood laga bilaabo marka dhagaysiga la codsaday waana in go'aan lasoo saaraa **10** maalmood oo kuwa dugsiga ah kadib marka dhagaysiga la sameeyo
2. Ilaa in adigga iyo degmada dugsigu ku heshiisaan si qoraal ah joojinta kullanka maahee, ama aad ku heshiisaan adeegsiga dhexdhexaadin, kulanka xalinta waa in la qabtaa **todobo** maalmood gudahood laga bilaabo marka lasoo gudbiso ogaysiiska dacwada cabashada ah. Dhagaysiga dacwada ayaa sii socon kara ilaa in arinta lagu xaliyo maahee qaab ay ku wada qancaan labada dhinac **15** maalmood gudahood marka lasoo gudbiyo dacwada cabashada ah.
3. Gobalka ayaa abuuri kara xeerar kale oo habraac oo loo maraayo dhagaysiyada dacwada boobsiiska ah kuwaasoo ka duwan kuway u dajisay dhagaysiyada dacwadaha kale, laakiin marka laga reebo jadwalka waqtiga, xeerarkaas waa inay waafaqaan xeerarka ku cad dukumiintigaan ee la xariira dhagaysiyada dacwada.

Adigga ama degmada dugsiga ayaa racfaan ka qaadan kara go'aanka dhagaysiga dacwada boobsiiska ah si lamid ah sidaad uga qaadan karteen dhagaysiyada dacwadaha kale (ka fiiri ciwaanka ***Racfaanka***).

GOOBTA CUNUGA IN RACFAANNADU SOCDAAN

34 CFR §300.533

Marka, sida kor lagu qeexay, adigga ama degmada dugsu aad gudbisaan dacwad cabasho ah oo la xariira arimaha anshaxa, waxaa qasab ah in cnunugaagu (marka laga reebo in adigga ama Wakaalada Wax Barashada Gobalka ama degmada dugsigu ku heshiisaan qaab kale) kusii jiro goobta waxbarashada ee ku meel gaarka ah inta go'aanka sarkaalka dhagaysiga dacwada aan la dhaqan galin, ama ilaa ay ka dhacdo mudada loo asteeyay inuu ka maqnaado dugsiga sida lagu sheegay laguna qeexay ciwaanka ***Awooda Shaqaallaha Dugsiga***, hadba kii soo hor mara.

DIFAACYADA CARRUURTA AAN WALI U QALMIN WAX BARASHADA GAARKA AH IYO ADEEGYADA LA XARIIRA

34 CFR §300.534

Macluumaad Guud

Haddii la go'aamin in cunugaagu xaq u leeyahay waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xariira uuna ku xad gudbo xeerka anshaxa ardayda, laakiin degmada dugsigu ogtahay (sida hoos lagu go'aanshay) ka hor intaan hab dhaqanka keenay talaabada edbinta ah aysan dhicin, markaas cunugaaga ayaa gali kara mid uun ka mid ah difaacyada lagu qeexay ogaysiiskaan.

Aasaasiyaadka ogaanshaha arimaha dhanka anshaxa

Degmada dugsiga waxaa lagu xukumayaa inay ogtahay in cunugaagu naafo yahay haddii, kahor intaan hab dhaqanka keenay talaabada edbinta uusan dhicin:

1. Aad sheegtay walaac aad qabto ood si qoraal ah ugu dirtay shaqaalaha kormeerka ama maamulka ee wakaalada wax barashada ee arintaani qusayso, ama macallinka cunugaaga in cunugaagu u bahaan yahay wax barashada gaarka ah iyo adeegyada la xariira;
2. Aad codsatay in la sameeyo qiimayn la xariira u qalmida wax barashada gaarka ah iyo adeegyada la xariira ee ku jira Qaybta B ee IDEA; **ama**
3. Macalinka cunugaaga ama shaqaalaha kale ee dugsigu ay sheegeen inay walaacyo gaar ah ka qabaan hab dhaqano taxanayaal ah oo cunugaagu muu jiyaya ayna toos ugu sheegeen agaasimaha degmada dugsiga ee wax barashada gaarka ah ama shaqaalle kale oo qaabilsan kormeerka kana tirsan degmada dugsiga.

Arimo reeban

Degmada dugsiga laguma xukumaayo inay arintaan ogayn haddii:

1. Aadan ogolaan in qiimayn lagu sameeyo cunugaaga ama aad diiday adeegyada wax barashada gaarka ah; **ama**
2. Cunugaaga aan qiimayn lagu samayn aana loo aqoonsan inuu yahay imo naafo ah sida ku cad Qaybta B ee sharciga IDEA.

Shuruudaha qabanaaya haddii aysan jirin ogaansho la ogaa xaalada

Haddii ka hor intaan laga qaadin talaabooyinka edbinta ah cunugaaga, ay degmada dugsigu wax ogaansho ah u lahayn in cunugagu yahay ilmo naafo ah, sida ku cad kor ciwaan doceedka ***Aasaasiyaadka ogaanshaha arimaha dhanka anshaxa iyo Arimo reeban***, cunugaaga waxa ala marsiin karaa talaabooyinka edbinta ah ee la marsiiyo ardayda aan naafada ahayn ee sameeya hab dhaqano xad gudub ah.

Hase yeeshee, haddii codsi la xariira qiimayn lagu sameeyo cunugaaga lasoo gudbiyay intii lagu jiray mudada cunugaagu maraayay talaabooyinka edbinta ah, qiimaynta waa in loo sameeyaa qaab boobsiis ah.

Ilaa laga dhamaynaayo qiimaynta, cunugaagu wuxuu kusii jirayaa goobta waxbarashada ee ay go'aamiyeen maamulka dugsigu, kuwaasoo ay kujiri karto hakin ama dugsi ka cayrin asagoon helayn wax adeegyo wax barasho ah.

Haddii la go'aansho in cunugaagu yahay mid naafo ah, ayadoo laga eegaayo xogta kasoo baxda qiimaynta ay samayso degmada dugsiga, iyo xogta aad adiggu bixiso, waxaa qasab ku ah degmada dugsiga inay siiso wax barashada gaarka ah iyo adeegyada la xariira si waafaqsan Qaybta B ee sharciga IDEA, ayna ku jiraan shuruudaha edbinta ee kor ku qoran.

WARGALINTA IYO TALAABADA AY QAADAYAAN LAAMAHA SHARCI FULINTA IYO SARAAKIISHA GARSOORKA

34 CFR §300.535

Qaybta B ee sharciga IDEA kama:

1. Mamnuucaayo wakaalaD Inay soo sheegto danbi uu galay ilmo naafo ah oo lagu wargaliyo saraakiisha shaqadaas leh; **ama**
2. Kama hor istaagaayo sharci fulinta Gobalka iyo saraakiisha garsoorka inay fuliyaan aajibaadkooda la xariira ku dabiqida sharciga Federaalka iyo kan Gobalka danbiyo uu galay inmo naafo ah.

Gudbinta diiwaannada

Haddii degmada dugsigu soo sheegto danbi uu galay ilmo naafo ah, degmada dugsigu:

1. Waa inay xaqiijisaa in koobiyada wax barashada gaarka ah ee cunuga iyo diiwaanadiisa anshaxa ay u gudbiso si ay uga baaraan dagaan saraakiisha wakaaladu u sheegayso danbiga; **iyo**
2. Waxay ku diri kartaa koobiyada wax barashada gaarka ah iyo diiwaanada anshaxa ee cunuga kaliya si waafaqsan Family Educational Rights and Privacy Act (FERPA, Sharciga Xaquuqda Waxbarashada Qoyska iyo Arimaha Shaqsiga ah).

SHURUUDAHA MEELAYNTA AY KALIGOOD GAARAAN WAALIDIINTA CARRUURTA DHIGTA DUGSIYADA GAARKA LOO LEEYAHAY EE QARASHKOODA DAWLADU KA DHIIBTO

SHURUUDAHA HEER FEDERAAL EE CARRUURTA SI ISKOOD AH ISKAGA QORAY DUGSIYADA GAARKA LOO LEEYAHAY

34 CFR §300.131 ilaa 34 CFR §144

Qaybta B ee sharciga IDEA kama doonaayo degmada dugsiga inay bixiso qarashka wax barashada, ayna kujiraan wax barashada gaarka ah iyo adeegyada la xariira, ee cunugaaga naafada ah ee dhigta dugsiga ama xarunta gaarka loo leeyahay haddii degmada dugsigu samayso adeegyada waxbarashada ku haboon cunuga ee dawlada oo bilaash ah (FAPE) oo uu heli karo cunugaagu aadna doorato inaad cunugaaga gayso dugsi ama xarun gaar loo leeyahay. Hase yeeshee, degmada dugsiga ee uu ku yaalo dugsiga gaarka loo leeyahay waa inay ku dartaan cunugaaga bulshada baahiyahooda lagu daboolo xeerakra Qaybta B ee la xariira carruurta waalidkood geeyeen dugsi gaar loo leeyahay sida ku cad 34 CFR §§300.131 ilaa 300.144.

*SHURUUDAHA HEER GOBAL EE CARRUURTA SI ISKOOD AH ISKAGA QORAY DUGSIYADA GAARKA LOO LEEYAHAY

K.S.A. 72-5393 iyo K.A.R. 91-40-43, 91-40-45, 91-40-46 iyo 91-40-47

Carruurta baahiyaha gaarka ah qaba ee dhigta dugsiyada gaarka loo leeyahay waxay xaq uleeyihiin inay helaan Free Appropriate Public Education (Waxbarashada Dawlada ee Bilaashka ah oo Ku haboon) (FAPE), ayagoo ku helaaya IEP ay abuurtay degmada dugsiga uu ardayga iyo waalidkiis dagan yihiin, marka la codsado. Hase yeeshee, ayadoo lala tashanaayo waalidka ama masuulka cunuga ama saraakiisha dugsiga gaarka loo leeyahay, degmada dugsigu waxay go'aaminaysaa goobta lagu siinaayo cunuga waxbarashada gaarka ah iyo adeegyada la xariira.

- Haddii adeegyada lagu baxsho dugsi dawladeed, dugsiga dawladu waa inuu cunuga siiyaa gaadiid kasoo qaada dugsiga gaarka loo leeyahay ama guriga oo keena goobta cunugu ku helaayo adeegyada kana soo qaada goobta uu cunugu ku helaayo adeegyada oo gaynaaya dugsiga gaarka loo leeyahay ama guriga cunuga.
- Haddii adeegyada lagu baxsho dugsi gaar loo leeyahay, qarashka bixinta adeegyada ayaa ku koobnaan kara qarashka caadiga ah ee degmada dugsiga ee bixinta isla adeegyada lagu baxsho dugsiyada dawlada.

Degmada dugsiga qasab kuma ahan inay bixiso adeegyada, ayna ku jiraan gaadiidka, meel ka baxsan xayndaabka degmada dugsiga.

Waalidiinta carruurta dugsiga gaarka loo leeyahay kuwaas oo helaayo adeegyada wax barashada gaarka ah iyo kuwa la xariira si waafaqsan IEP ayaa codsan kara dhexdhexaadinta wax barashada gaarka ah ama keeni kara dac dhagaysi oo la xariira wax barashada gaarka ah.

MARKA ARINTU LA XARIIRTU FAPE

34 CFR §300.148

Bixinta qarashka meelaynta dugsiga gaarka loo leeyahay

Haddii uu cunugu horay u helay wax barashada gaarka ah iyo adeegyada la xariira oo ay bixinaysay degmada dugsigu, aadna doorato inaad cunugaaga ka qorto dugsi gaar loo leeyahay oo barbaarin, dugsi hoose/dhexe ah, ama dugsi sare ah adoon ogolaansho ka helin ama aysan kuu gudbin degmada dugsigu, maxkamad ama sarkaalka dhagaysiga ayaa ka dooni kara wakaalada inay bixiso qarashka diiwaangalinta haddii maxkamada ama sarkaalka dhagaysigu ogaado in aan wakalaadu siin adeegyada wax barashada dawlada ee bilaashka ah oo ku haboon cunugaaga (FAPE) waqtigii la rabay kahor intaadan samayn diiwaan galintaas meelaynta dugsiga gaarka loo leeyahayna tahay mid sax ah. Sarkaalka dhagaysiga ama maxkamada ayaa ogaan kara in meelayntaadu tahay mid sax ah, xataa

haddii aan meelayntu buuxin heerarka u dagsan Gobalka ee quseeya wax barashada ee ay bixiso State Educational Agency (Wakaalada Wax barashada ee Gobalka) iyo degmooyinka dugsiga.

Xadidaada magdhowga

Qarashka soo magida ah ee lagu qeexay farqada kore ayaa la yarayn karaa ama la diidi karaa:

1. Haddii: (a) Intii lagu jiray kulankii ugu danbeeyay ee barnaamijka wax barashada gaarka ah (IEP) ee aad ka qaybgashay kahor intaan cunugaaga laga saarin dugsiga dawlada, aadan u sheegin Kooxda IEP da inaad diidan tahay soo jeedinta meelaynta ay samaysay degmada dugsiga si loo siiyo adeegga FAPE cunugaaga, ayan ku jiraan inaad sheegto walaacyada aad qabto iyo inaad doonayso inaad cunugaaga ka qorto dugsi gaar loo leeyahay oo qarashkiisa ay bixinayso dawladu; ama (b) ugu yaraan 10 maalmood oo kuwa shaqada ah (ayna ku jiraan fasaxyo kasta oo dhaca maalmaha shaqada) ka hor intaan cunugaaga laga saarin dugsiga dawlada, aadan ogaysiis qoran u dirin degmada dugsiga adoo u sheegaaya xogtaas;
2. Haddii, kahor intaan cunugaaga laga saarin dugsiga dawlada, ay degmada dugsigu ku siisay ogaysiis qoran oo la xariira inay doonayso inay qiimayn ku samayso cunugaaga (ayna ku jirto bayaanka ujeedada qiimaynta oo ahaa mid haboon oo macquul ah), laakiin aadan cunuga u keenin qiimayn lagu sameeyo; **ama**
3. Marka maxkamadu ogaato in talaabooyinkaagu ahaayeen kuwo bilaa sabab ah.

Hase yeeshee, qiimaha lacagta mag dhawga ah:

1. Waa inaan la yarayn ama la diidin sabab la xariirta inaadan ogaysiis keenin haddii: (a) Dugsigu kaa hor istaagay inaad ogaysiiska keento; (b) Anaan lagu siin ogaysiis masuuliyadaada ah inaad ogaysiis keento sida kor ku cad; ama (c) In ku dhaqanka shuruudaha kore ay keeni karaan dhibaato jireed oo gaarta cunugaaga; **iyo**
2. Lama, ayadoo la raacaayo go'aanka maxkamada ama sarkaalka dhagaysiga, aan lagaa dhimaynin ama diidi karin sabab la xariirta inaad keeni wayday ogaysiiskii loo baahnaa haddii: (a) Ma tihid aqoonyahan ama aadan qori karin Ingiriiska; ama (b) In ku dhaqanka shardiga kore ay keeni karto dhibaato daran oo dhanka dareenka ah oo gaarta cunugaaga.